

AQOONTA KULLIYADA

**DEDAAL WADA SHAQAYN LEH EE U DHEXEeya URURADA SI AY U BIXIYAAN
MACLUUMAADKA U DIYAAR GARAWGA DHAMMAYSKA TIRAN EE KULLIYADA**

LAGU
HORUMARIYAY
**RAYIGA
ARDAYGA**



pcccr
Puget Sound College and Career Network

Road Map
Project 

WASHINGTON STUDENT
ACHIEVEMENT COUNCIL
EDUCATION · OPPORTUNITY · RESULTS

WCAN WASHINGTON
COLLEGE ACCESS NETWORK

AQOONTA KULLIYADA

JADWALKA WAQTIGA

SEBTEMBAR-OKTOOBAR

FASALKA 9 – 10

2 WAXYALAHA KU SAABSAN DHAMMAAN DUGSIGA SARE

1 FAA'IIDOOYINKA TEGIDA KULLIYADA

FASALKA 11

1 NOOCYADA KULLIYADA

1 WAXYALAHA DHAMMAAN KU SAABSAN TABABARKA XIRFADA

FASALKA 12

4 WAXYALAHA DHAMMAAN KU SAABSAN FAFSA

4 WAXYALAHA DHAMMAAN KU SAABSAN WASFA

5 QAYBAHA CODSIGA KULLIYADA

NOOFAMBAR – DIISAMBAR

FASALKA 9 – 10

1 NOOCYADA KULLIYADA

1 WAXYALAHA DHAMMAAN KU SAABSAN TABABARKA XIRFADA

2 DHISIDA SOOYAALKAAGA KULLIYADA

FASALKA 11

5 CILMI BAADHIDA KULLIYADA

4 QAABABKA LACAGTA KULLIYADA LOO BIXIYO

FASALKA 12

5 SIDA LOO CODSANAYO

4 DEEQDA WAXBARASHO

FURAHA

1 KU SAABSAN KULLIYADA IYO MIHNADA

2 ISU DIYAARIN

3 DEEQADA WAXBARASHO EE COLLEGE BOUND (CBS)

4 LAGU BIXINAYO QARASHKA KULLIYADA

5 CODSANAYA KULLIYADA

6 ISDIIWAANGELINTA KULLIYADA

JANAAYO – FEBRAAYO

FASALKA 9 – 10

2 DOORASHADA FASALADA DUGSIGA SARE SAXDA AH CBS: DHAMMAAN WAXYALAHA KU SAABSAN

3 CBS: BALLANKA

FASALKA 11

3 CBS: HELLIDA

4 DEEQDA WAXBARASHO

FASALKA 12

3 CBS: HELLIDA

4 FAHANKA ABAALMARINTA WARQADDA KAALMADA DHAQAALAHA

MAARSO – ABRIL – MAAYO

FASALKA 9 – 10

1 KULLIYADA IYO ISKU XIDHKA MIHNADA

4 QAABABKA LACAGTA KULLIYADA LOO BIXIYO

FASALKA 11

5 QAYBAHA CODSIGA KULLIYADA

2 U DIYAAR GAROWGA SANADKA DUGSIYEEDKA UGU DANBEEYA

4 WAXYALAHA DHAMMAAN KU SAABSAN FAFSA

4 WAXYALAHA DHAMMAAN KU SAABSAN WASFA

FASALKA 12

6 GO'AAN QAADASHADA

6 U WAREEGIDA KULLIYADA

6 WAXA LA FILAN KARO SEEMISTARKA OOWAAD

6 ILAHA KULLIYADA EE AAD U BAAHANTAHAY INAAD ISTICMAASHO



FASALKA 9AAD

JADWALKA WAQTIGA

SEBTEMBAR KU SAABSAN DHAMMAAN DUGSIGA SARE

Baro wax ku saabsan waxa aad u baahantahay inaad samayso si aad u qalanjebiso iyo sida loo noqdo mld guul ka najaxa dugsiga sare.

OKTOOBAR FAA'IIDOOYINKA TEGIDA KULLIYADA

Sahami faa'iidooyinka tegida kulliyada oo baro sida digriiga kulliyada ama shahaadadu ay kaaga caawin karto inaad shaqo hesho.

NOOFAMBAR NOOCYADA KULLIYADA / DHAMMAAN KU SAABSAN TABABARKA XIRFADA

Sahmi faraqa u dhaxeeya noocyada kulliyadaha iyo ikhtiyaarada tababarka laga dooranyo (tababka kala duwan ee aad kala dooran karto).

DIISAMBAR DHISIDA SOOYAALKAAGA KULLIYADA

Xoog saarida wax wanaagsan ka samaynta dugsiga sare, u joogida si abaabulan iyo ka qayb qaadashada hawlaha.

JANAAYO DOORASHADA FASALADA SAXDA AH EE DUGSIGA SARE

La hadal la taliyahaaga, qoyska ama saaxiibada wax ku saabsan qorshayaashaada dugsiga sare ka dambeeya.

FEBRAAYO DHAMMAAN KU SAABSAN WAXA COLLEGE BOUND / BALLANKA DEEQDA WAXBARASHO EE COLLEGE BOUND

Haddii aad ku biirtay, baro wax ku saabsan Deeqda Waxbarasho ee Bound College iyo Ballanka.

MAARSO KULLIYADA IYO ISKU XIDHKA MIHNADA

Fahan sida waxa aad ku barato kulliyada ay kuugu heli karaan shaqada riyoooyinkaaga ah.

ABRIIL QAABABKA LACAGTA KULLIYADA LOO BIXIYO

Baro wax ku saabsan noocyada kala duwan ee lacagta ee kaa caawin karta inaad ku bixiso kulliyada.

Ma uga baahantahay caawimo shuruudahayaga? Eeg **qaamuuska erayada** websaydkayaga:

FASALKA 10AAD

JADWALKA WAQTIGA

SEBTEMBAR KU SAABSAN DHAMMAAN DUGSIGA SARE

Baro waxyalaha ku saabsan waxa aad u baahantahay inaad qalanjebiso iyo sida loo noqdo mud guul ka gaadha dugsiga sare.

OKTOOBAR FAA'IIDOOYINKA TEGIDA KULLIYADA

Sahami faa'iidooyinka tegida kulliyada oo baro sida digriiga kulliyada ama shahaadadu ay kaaga caawin karto inaad shaqo hesho.

NOOFAMBAR NOOCYADA KULLIYADA / DHAMMAAN KU SAABSAN TABABARKA XIRFADA

Sahmi faraqa u dhaxeeya noocyada kulliyadaha iyo ikhtiyaarada tababarka laga dooranyo (tababka kala duwan ee aad kala dooran karto).

DIISAMBAR DHISIDA SOOYAALKAAGA KULLIYADA

Xoog saarida wax wanaagsan ka samaynta dugsiga sare, u joogida si abaabulan iyo ka qayb qaadashada hawlaha.

JANAAYO DOORASHADA FASALADA SAXDA AH EE DUGSIGA SARE

Kala hadal la taliyahaaga, qoyska ama saaxiibada wax ku saabsan qorshayaashaada dugsiga sare ka markaad ka qalinjibiso.

FEBRAAYO DHAMMAAN KU SAABSAN WAXA COLLEGE BOUND / BALLANKA DEEQDA WAXBARASHO EE COLLEGE BOUND

Haddii aad ku biirtay, baro wax ku saabsan Deeqda Waxbarasho ee Bound College iyo Ballanka.

MAARSO KULLIYADA IYO ISKU XIDHKA MIHNADA

Fahan sida waxa aad ku barato kulliyada ay kuugu heli karaan shaqada riyoooyinkaaga ah.

ABRIIL QAABABKA LACAGTA KULLIYADA LOO BIXIYO

Baro waxyalaha badan oo ku saabsan noocyada lacagta kugu caawin kara inaad kulliyada ku bixiso.

FASALKA 11NAAD

JADWALKA WAQTIGA

OKTOOBAR NOOCYADA KUYLLIYADA / DHAMMAAN KU SAABSAN TABABARKA XIRFADAHA

Soo koob kulliyadaada ama doorashooyinka tababarka oo la kullay lataliyahaaga si aad u qiimayso qorshayaashaada dugsiga sare ka dambeeya.

NOOFAMBAR CILMI BAADHID KU SAMAYNTA KULLIYADAHA

Soo xaadir kulliyad iyo carwada mihiyada ama qabso balan booqashada kulliyada si aad u barato hadii kulliyada tahay kulliyadaha haboonaanta fiican ah.

DIISAMBAR QAABABKA LACAGTA KULLIYADA LOO BIXIYO

Fahan sida loo bixiyo lacagta kulliyada iyaddoo la isticmaalayo kaalmada dhaqaale iyo deeqda waxbarasho.

JANAAYO HELIDA DEEQDA WAXBARASHO EE BOUND COLLEGE

Markaas, waxaad haysataa Bound College: Hubso inaad buuxiso shuruudaha si markaas waxaad heli kartaa deeqda waxbarashadda.

FEBRAAYO DEEQAHA WAXBARASHADDA

Baro waxa ku saabsan noocyada deeqaha waxbarashadda iyo sida loo codsado.

MAARSO QAYBAHA CODSIGA KULLIYADA

Dhammaan kulliyadaha iyo barnaamijyada caddaymahu waxay leeyihiin shuruudo codsi oo u gaar ah. Baro wax ku sabasan qaybaha kala duwan iyo waxa aad u baahantahay inaad codsato

ABRIIL DIYAARINTA SANADKAAGA SARE

Baro waxa aad u baahantahay inaad qabato si aad uga qalanjebiso dugsiga sare oo aad diyaar ugu noqoto kulliyada.

MAAYO DHAMMAAN KU SAABSAN FAFSA /DHAMMAAN KU SAABSAN WASFA

Baro waxylaha ku sabasan FAFSA ama u qalmida WASFA iyo sida loo codsado si lagaaga caawiyo bixinta lacagta kulliyada.

Ma uga baahantahay caawimo shuruudahayaga? Eeg [qaamuuska erayada](#) websaydkayaga:

FASALKA 12NAAD JADWALKA WAQTIGA

SEBTAMBAR WAXYALAHA DHAMMAAN KU SAABSAN FAFSA / DHAMMAAN KU SABASAN WASFA

U diyaar garow inaad codsato FAFSA ama WASFA markaas waxaad u diyaar tahay marka codiyada furmayaana Oktoobar 1.

OKTOOBAR QAYBAHA CODSIGA KULLIYADA

Codsi kasta oo kulliyadu waxa uu yeelan doonaa shuruudo kala duwan. Garo waxa aad u baahantahay si aad u diyaariso codsigaaga.

NOOFAMBAR SIDA LOO CODSADO

Go'aanso waxay tahay tallaabooyinka aad u baahantahay inaadku dhammaystiro codsiyadaada kulliyada.

DIISAMBAR DEEQAHA WAXBARASHADDA

Cilmi baadhid ku samee oo codso deeq waxbarashoo HADDA.

JANAAYO HELIDA DEEQDA WAXBARASHO EE BOUND COLLEGE

Markaas, waxaad haysataa Bound College: Baro sida Deeqda waxbarashada Bound College ay kaaga caawin doonto inaad bixiso lacaga kulliyada.

FEBRAAYO FAHANKA WARQADDAHA ABAAL MARINTA KAALMADA DHAQAALAHA

Fahan warqaddaada abaal marinta kaalmada dhaqaalaha iyo sida loo go'aamiyo tallaabooyinkaaga xiga.

MAARSO GAADHIDA GO'AANADAADA

Hadda oo aad heshay warqaddahaaga aqbalaada, go'aan ka gaadh kulliyada doorashada fiican kuu ah ADIGA!

ABRIIL U WAREEGIDA KULLIYADA

Hubso inaad dhammaystirtay wax kasta oo aad u baahantahay si aad isugu diiwaangeliso kulliyada aad dooratay.

MAAYO WAXAANU FILAYNAA TEERAMKAAGA U HOREEYA / ILAHA KULLIYADA EE AAD U BAAHANTAHAY INAAD ISTICMAASHO

Kulliyadu aad ayay uga duwantahay dugsiga sare. Qorshee ilaha kala duwan ee kulliyada ee ku caawin doona hayso sanad guuleh sanadka koowaad.

Ma uga baahantahay caawimo shuruudahayaga? Eeg **qaamuuska erayada** websaydkayaga:

1 KU SAABSAN KULLIYADA IYO MIHNADA

CUTUBKAN:

FAA'IIDOOYINKA TEGIDA KULLIYADA

KULLIYADA IYO ISKU XIDHAKA MIHNADA

NOOCYADA KULLIYADAHA EE KALA DUWAN

DHAMMAAN KU SAABSAN TABABARKA XIRFADA

KU SAABSAN KULLIYADA

IYO KULLIYADA: FAA'IIDOOYINKA

DHIGASHADA KULLIYADA

Shahaadada **kulliyada** waxay kaa caawin doontaa adiga **helitaanka shaqo sare oo mushar leh iyo in degdeg lagu shaqaaleeyo**. Helitaanka shahaadada kulliyada ama **shahaado** waxay noqon kartaa shayga ugu wanaagsan ee aad qaban karto mustaqbalka.

SABABTEE AYAAN U TEGAYAA KULLIYADA?

HEL SHAQO KA WANAAGSAN OO DEGDEG BADAN

Gobolka Washington waxa uu leeyahay dhaqaalaha 7aad ee ugu koboca badan Maraykanka Waxaa jiri doona **furitaanada 740,000 shaqo** gobolkan 5 sanadood ee soo socda (Boston Consulting Group & Washington Roundtable, 2016).

Sanadka 2020, **70% DHAMMAAN shaqooyinka** gobolka Washington waxay u baahan donaa ugu yaraan waxbarashadda kulliyada (Carnevale, Smith & Strohl, 2015).

99% shaqooyinka cusub inta u dhexaysa 2010 iyo 2016 waxay u tageen dadka leh wax ka badan waxbarashadda dugsiga sare (Carnevale, Jayasundera, & Gulish, 2016).

Xirfad yaqaanada dhalin yarada ah ee leh dibloomada dugsiga sare waa **3 wakhti ay dhici kartaa** inay noqdaan kuwa aan shaqo hayn marka la barbardhigo xirfadyaqaanada dhalinta yar ee sita **digriiga bekelooriyada** (Taylor, Fry & Oates, 2014).

WAY WANAAGSANTAHAY IN LA GARTO:

Waxa aad kulliyada ku barataa ayaa muhiim ah.

Digriiyada qaarkood aad ayaa loo raadiyaa oo waxay keenaan mihnado mushahar sareeya. Hadda, digriiyada sayniska, teknoolajiga, injineerinka, xisaabta (STEM), caafimaadka iyo ganacsig ku hogaaminaya gelitaanka ugu sareeya ee heerka mushaharka.

IN LA SHAQAYSTO LACAG BADAN

Waxaa jira gol daloolo, **baaxad leh oo u dhaxeeya musharka ah** xirfad yaqaanada waxbartay iyo kuwa ka aqoonta yar (Taylor, Fry & Oates, 2014).

Dhalinta yar ee sidata **digriiga Koowaad ee Labada Sano** waxay shaqaystaan celceliska **\$5,000 oo dheeraad ah sanadkii** oo ay dheer yihiin diblooda dugsiga sare kuwa sida (Kena et al., 2016).

91% "mihnadaha sahaada" Gobolka Washington (shaqooyinka u baahan xirfado sare iyo mushahar \$60,000 ilaa \$100,000 sanadkii) waxaa buuxin doona shaqaalaha leh digriiga kulliyada ama kulliyad uun (Boston Consulting Group & Washington Roundtable, 2016).

CELCELISKA DAKHLIGA EE HEERKA WAXBARASHADDA

Ka yar
Dugsiga sare:
\$26,780

Ardayga dhammaystay
dugsiga sare:
\$37,336

Kulliyada qaarkeed ama digriiga
asooshiyaytka:
\$41,548

Digriiga bekelooriyada:
\$61,828

Digriiga sare (mastarta xirfadeed iyo digriiyada digtooraaga):
\$75,452

(Bureau of Labor Statistics, 2017)

OKTOOBAR: FASALKA 9 iyo 10



KU SAABSAN KULLIYADA IYO KULLIYADA: KULLIYADA & MIHNADA ISKU XIDHKA

Shakhsiyaaadka sida digriiga **kulliyada** waxay shaqaystaan \$1 milyan wax ka badan noloshooda oo dhan marka la barbar dhigo kuwan sita dibloomada dugsiga sare. (Khan Academy, 2014).

WAXA WAXBARASHADDA AY U QABTO RIYADAYDA SHAQO AY U BAAHANTAHAY?

Waxaad kala dooran kartaa boqolaal ah **shahaadooyin sare** iyo **shahaadooyinka**. Caadi ahaan, badanku waxay ukala baxaan laba qaybood: **farshaxanka** ama **shaqadu ugu soo horayn karto**.

KUWA SHAQADU UGU SOO HORAYN KARTO EE SHAHAADADAHA SARE IYO SHAHAADOOYINKA

kaas oo xooga saara horumarinta xirfado gaar ah iyo aqoonta wixii ah **mihnadaha gaarka ah**

Bay'olajiga bada

Fanka wax karina

Daraasadaha sharciga

Injineernimada

Sixada ilkaha

* SAMEE CILMI BAADHID:

Cilmi baadhid ku samee kulliyadaha kala duwan si aad u fahanto kuwa bixiya barnaamijka shahaadada, ta sare ama/iyo digriiga aad u baahantahay mihnadeeda. Waxa aad doorataa waxa uu saamayn doonaa inta ay tahay lacagta aad shaqaysataa.

FARSHAHANKA SHAHAADOOYINKA SARE

oo ay kamid yihiin suugaanta, falsafada, taariikhda iyo lkuqaddaha. Shahaadooyinkan sare way ka ballaadhanyihiin oo waxay keeni karaan shaqooyin kala duwan oo aan u baahnayn aqoon gaar ah ama farsamo.

Ingriisiga – tafatiraha, fuliyaha suuq gaynta, qoraaga

Luqadda ajnabiga ah – sarkaalka adeega ajbaniga, turjubaan, macalin

Cilmiga siyaasada – abaabulaha bulshadda ama qofka bulshadda u dhaqdhaqaaqa, qareenka, baadhaha siyaasada

Cilmi nafsiga – cilmi baadhaha suuqa, shaqaalaha bulshadda, la taliyaha caafimaadka maskaxda

MA GARANAYSID WAXAAD DOONAYSO INAAD WELI SAMAYSO?

1 Ka feker danahaaga.

Qor fikradaha shaqada iyo xiisaha oo ka dib cilmi baadhid ku samee sida ay ugu xidhmi karaan shaqo.

Booqo careerbridge.wa.gov si aad u sahamiso mihnadaha.

2 Go'aan ka gaadh sida loogu qalmo shaqooyinka kala duwan.

Baro **shuruudaha shaqada** (xirfadaha, fasalada, digriiyada gaarka ah ama tababarka, iwm.)

La hadal la taliyaha mihnada, macalinka ama xubinta qoyska.

3 Ka hel khibrad.

Mutadawic noqo, hel **tababarka shaqo** ama **bixinta khibrada shaqo**.

MAARSO: FASALKA 9 iyo 10



KU SAABSAN KULLIYADA IYO KULLIYADA: NOOCYADA KULLIYADA

Erayga kulliyada waxaa ka mid ah kulliyada farsamada, 2-sano kulliyada bulshada, **tababarka xirfadaha** ama dugsiyada ganacsiga iyo kulliyadaha ama jaamacadaha 4-sano ah. Ma jiro hal nooc oo kulliyad ah oo ku habboon qof kasta, markaas waa muhiim in aad sahmiyo doorashooyinkaaga.

HALKEE AYAAN U TAGAA KULLIYADA?

Kulliyada/ Tababarka xirfada Gaarka ah 2-sanadood/ Dugsiyada Ganacsiga

Gaar ah 2- sano tababarka xirfada ama dugsiyada ganacsiga waxya bixiyaan mihiin gaar ah. Ardayda ka qalan jebiso dugsiyadan waxay noqon karaan cunto kariyayaal, daaweeyaha jidhka ee duugida, ama sharic yaqaano.

Kulliyadaha Bulshadda iyo Farsamda (CTCS)

Dugsiyada waxay bixiyaan **digiriiga koowaad ee labada sano** iyo **shahaadooyinka**, ay ka mid yihiin ganacsiyada **gaarka ah**. Gobolka Washington waxa uu leeyahay 34 CTCs dad waynaha ah. Ardayda ka qalan jebisa CTCs waxay geli karaan mihiinadaha, sida kalkaaliska, samaynta baabuurta iyo amniga kombuyuurada.

Baro wax badan oo ku saabsan barnaamijyada ku bixiyaan **checkoutcollege.com**



Qaar ka mid ah CTCs waxay iminka bixiyaan **Digriiga bekelooriyada.**

Kuwa Guud iyo kuwa Gaar ah Kulliyada/Jaamacada 4-sano

Dugsiyadan waxay bixiyaan digriiga, caadi ahaan ay dhammaystirtay 4 sano daraasada wakhtiga buuxa ah. Dugsiyada gaarka ah caadi ahaan waxay ka qaadaan kharash waxbarasho **oo sare** laakiin waxay bixin karaan qadarka muhiimka ah ee **deeqda waxbarasho** si looga dhigo soo xaadirka la awoodo. Ardayda ka qalan jebisay dugsiyadan waxay noqon doonaan injineerka roobadyada, baadhayaasha ganacsiga, ama khabiiirka nafaqadda.

OKTOOBAR: FASALKA 11
NOOFAMBAR: FASALKA 9 iyo 10

Hubso in dib loo eego WAX KASTA oo aqoonsiga dugsiiga iyo qiimayaasha shaqa siinta.

40% ah 4-sano ardayda qalanjebisa gudaha Washington waxay ka bilaabantay kulliyada bulshadda.

Jaantuuskan waxa uu muujinayaa sifooyinka nooc kasta oo kulliyada gobolka Washington.

	Kulliyadaha Bulshadda iyo Farsamda	Kulliyadaha Dad waynaha 4-sano	Kulliyadaha Gaarka ah 4-sano
Xulashadda Dhammaan u baahan codsi . Kulliyadaha dhexdhexaadka ah iyo kuwa sare ee aadka loo xusho caadi ahaan waxay u baahanyihiin inay gudbiyaan curisyo, darajooyin. Buundooyinka imtixaanka iyo waxyaaba kale.	Si yar loo xusho	Dhexdhexaad ilaa si sare loo xusho	Dhexdhexaad ilaa si sare loo xusho
Cabbirka Goobta waxbarasho tirada ardayda jaamacada aan weli qalanjebin	5,000-30,000	Wax ka badan 10,000	Ka yar 5,000
Kharashka waxbarashadda Kharashka waxbarashadda sanadkii diiwaangelinta sanadka buuxa (dadka deegaanka ah loogu talo galay)	Hoose (ilaa \$4,000)	Dhexe (\$7,000-\$11,000)	Sare (kabaddan \$30,000)
Shahaadada digriiga Shahaadooyinka la bixiyo	Shahaadooyinka iyo digriiyada asooshiyoodka (AA, AAS)	Digriiga bekelooriyada (BA ama BS)	Digriiga bekelooriyada (BA ama BS)



KU SAABSAN KULLIYADA

IYO KULLIYADA: WAXYAALAHA DHAMMAAN

IYADA KU SAABSANTABABARADA XIRFADAHA SHAQO

Gudaha tababarka xirfada, waxaad kartaa **Inaad shaqaysato lacag markaad waxbaranayso** isku darka diyaarka ah, **tababarka shaqada (OJT)** iyo fasalada tacliinta la xidhiidha. Tababarka shaqada waa mid tartan leh oo adag, oo caadi ahaan waxay aad uga dalab badanyihiin **shaqaalaha tababarka**.

TABABARKA XIRFADAHA SHAQO



Tababarka shaqada waxaa bixiya loo shaqeeyayaasha (sida Boeing), **ganacsiga ururada** (sida shaqaalaha korontada ama saqaf saarayaasha) iyo barnaamij madax abanaan. **Barnaamijyada caadi ahaan waxay gaadhaan 2-5 sanadood** oo waa hab wanaagsan oo loo bilaabo shaqada lacagta fiican laga qaato. Barnaamijyada tababarka shaqada waxay bixiyaan caddaymo, liisamo iyo/ama digriiga **kulliyadaha**.

SHAQADEE AYAAN HELI KARAA QOF TABABAR QAADANAYA AHAAN?

Tababarka shaqada waxaa laga heli karaa qaybo badan sida **qaybta duulimaadka, warshadaynta casriga ah, dhismaha, tamarka iyo farsamada badda**.

Tusaalooyinka shaqooyinka waxaa ka mid ah:

Makaaniga diyaaradaha	Shaqaalaha korontada
Makaaniga baabuurta	Dad demiye
Lebin dhigaha	Shaqaale qasabadeed
Nijaarka	Wade baabuur wayn
Guri sibdhiye	Laxaamad leh

INTEE IN LE'EG AYAAN MUSHAHAR U QAADAN KARAA?

Shaqaalaha tababarka shaqado way shaqaystaan markay ku jiraan barnaamijka; mushaharku waxa uu kordhaa marka ay horumaraan. Marka qalan jebinta, waxay noqdaan "heerka shaqaalaha socda".

Bilaabida tababarka – ugu yaraan \$18/saacadii + **dheefaha** (tusaale caafimaadka, ilkaha iyo araga)

- Tusaale, tababarka shaqada Seattle City Light waxay shaqaystaan ugu yaraan \$30/saacadii inay bilaabaan.

Shaqaalaha heerka safarka (ardayga tababarka shaqo) – ugu yaraan \$30/saac + dheefaha (tusaale caafimaadka, ilkaha, araga iyo hawlgabka)

- Tusaale, shaqaalaha qasabada Degmadda King iyo sameeyayaasha beebabka, waxay shaqaystaan \$77/saacadii marka sibdhiyaha guriga Yakima shaqaysto \$40/saacadii.

*SIDEE LOO NOQDAA QOF SHAQO LOO TABABAYO?

1 Hubso inaad buuxiso shuruudaha. Guud ahaan, kuwan waxaa ka mid ah:

- Dibloomada **Dugsiga Sare**
- Kartiyaha la caddeeyay (waxay u baahan karaan xisaab)
- Liisanka darawalnada shaqaynaya iyo gaadiid la isku halayn karo

2 Hel barnaamij oo codso.

- Barnaamij kasta waxa uu leeyahay nidaamyo gaar ah oo lagu codsado.
- Si aad wax badan uga barato nidaamka, la hadal la taliyahaaga dugsiga sare ama booqo apprenticeship.lni.wa.gov.

Macluumaadka laga soo qaatay: Waaxda Gobolka Washington ee Shaqada iyo iyo warshadaha. (2012). *Hagaha Waalidka ee Tababarka shaqada*.

OKTOOBAR: FASALKA 11
NOOFAMBAR: FASALKA 9 iyo 10



ISU DIYAARIN

CUTUBKAN:

WAXYALAHA KU SAABSAN DHAMMAAN DUGSIGA SARE

DOORASHADA FASALADA SAXDA AH EE DUGSIGA SARE

DHISIDA SOOYAALKAAGA KULLIYADA

U DIYAAR GAROWGA SANADKAAGA SARE

HELIDA DIYAARA: DHAMMAAN KU SAABSAN DUGSIGA SARE

Dugsiga sare waa wakhtiga la dhisayo xirfadahaaga oo la sahaminayo xiisahaaga si aad ugu diyaar garowdo nolosha ka dambaysa dugsiga sare. Si aad halkaas uga qalanjebiso waxaa jira shuruudo aad buuxinayso oo aad ayay muhiim u tahay in la garto iyaga.

MAXAAN U BAAHANAHAY INAAD SAMEEYO SI AAN UGA QALAN JEBIYO DUGSIGA SARE?

Shaqayso dhibcaha loo baahan yahay – Ardayda Gobolka Washington waa inay dhammaystiraan **ugu yaraan 24 dhibcood** si ay uga qalanjebiyaan dugsiga sare. Si kastaba ha ahaatee, dugsiga sare waxa uu yeelan karaa shuruudo qadarin yar oo ka duwan.

Fasal kasta oo aad qaadato dugsiga sare waxa uu kuu dhoweeyaa qalan jebinta. La hadal la taliyahaaga si aad liis uga hesho shuruudaha dugsigaaga ah.

Buuxi heerka qiimaynaha gobolka – Waa inaad qaadataa oo gudubtaa **qiimaynta gobolka** fanka luqadda ingiriisiga, xisaabta iyo sanyinka ama qaado oo buuxi heerka mid kamid ah beddelaadaha kala duwan ee gobolku ansixiyey.

Dhammaystir Dugsigaaga Sare iyo Qorshaha Ka dambeeya – Ka bilaabmaysa fasalka 7aad ama 8aad waxaad samayn doontaa qorshe lagu caawiyo inaad ka fekerto mustaqbalkaaga oo u doorato fasalada kuu diyaariya adiga hadafyada ka dambeeya dugsiga sare.

TILMAAMAHA:

- ✱ Waxa aad ka samayso dugsiga sare waxa uu saamayn karaa mustaqbalkaaga
- ✱ Dareenka u soo jeedi fasalka oo raad raac buundooyinkaaga
- ✱ Isticmaal qorsheeye si aad u baabusho oo qor laylisyada, taariikhda la filayo iyo masuuliyadaha kale
- ✱ Ha ka baqin inaad caawimo waydiisato. Naftaada u dood oo waydiiso taageero lataliyaashaada, macalimiinta, xubnaha qoyska iyo barayaasha.

DUGSIYADA QAARKOOD WAXAY LEEYIHIIN SHURUUDO DHEERAAD AH OO QALINJABINTA AH

La tasho la taliyahaaga dugsiga si aad u aragto haddii wax shuruuda ah oo kale ay jiraan oo lagu shaqaysto **dibloomadaada**.

Celceliska Buunda La Ururshay (GPA)

–Deeqda Waxbarasho ee College Bound iyo degmo dugsiiyeedyo kale waxay u baahan yihiin ugu yaraan 2.0 GPA si loo qalanjebiyo. Inta uu sareeyo **GPA** kaaga, inta abadan ee kulliyada iyo doorashooyinka deeqda waxbarasho lagu heli karo.

Adeegyada Barashada – Waxaad u baahan kartaa inaad dhammayso saacadaha waxbarashada, halka aad dib ugu celiso kulliyada oo muujiso khibradaada.

SEBTAMBAR: FASALKA 9 iyo 10



HELIDA DIYAARA: XAQA DOORASHADA FASALADA DUGSIGA SARE

MAXAY YIHIIN FASALADA AAN QAADANAYAA?

Fasalada aad ku qaadato dugsiga sare waxay kuu diyaariyaan adiga qorshayaashaada dugsiga sare ka dambeeya. Haddii aad doorato inaad sii wadatid **tababarka xirfada** ama **farsamada**, mid **2-sano** ah, mid **4-sano** ah, ama akadamiya milatariga, waxaad dooni doontaa inaad barato shuruudaha oggolaanshaha.

WAXYAABAHA LA OGAANAYO:

- Shuruudahaaga qalan jebinta dugsiga sare **ma dhici karto** inay isku mid ahaado sidii shuruudaha oggolaanshaha kulliyada.
- 4-sanadood oo kulliyada ah waxay leeyihiin shuruudaha aadka loo doorto.
- Kulliyada farsamo iyo 2-sanadood waxay ka yaryihiin shuruudaha aadka loogu doorashada yar yahay.

XISAABTU WAAMUHIIM:

- Barnaamijyada kulliyada, shaqo-baradnimada, iyo ikhtiyaarada milatariga intooda badan waxay kaa rabaan inaad xisaab qaadato. Qaadashada xisaab badan gudaha dugsiga sare waxay la macno ahaan kartaa xisaab yar kulliyada gudaheeda iyo fursado badan wixii ka dambeeya dugsiga sare.
- In ka badan 50% ardayda ka qalanjebisa dugsiga sare u diyaar maaha fasalada heerarka kulliyada.
- Qaadashada afar sanadood oo xisaabta dugsiga sare ah waxay kaa caawin doontaa u diyaar garowga kulliyada oo waxay kaa caawin doontaa kaydinta kharashka waxbarida!

XUSUUSIN:

Hubi inaad eegto shuruudaha tacliineed iyo fasalka ee kulliyadaha (2 sano, 4 sano, ama farsamo) ee aad danaynayo inaad dhigato.

WAA MAXAY WAXA KULLIYADAHU RAADINAYAAN?

- Jadwal fasal oo loolan leh, oo ay kujiraan koorsooyin halkaa soo aad ka kasban karto buundo kulliyad. Tusaalayaasha waxa kujira, **Meelaynta Sare (AP)**, **Shahaadada Caalamiga ah ee Bekelooriyadka (IB)**, **Cambridge International**, Kulliyada Dugsiga Sare (College in the High School), **Orodka Bilowga (Running Start)** ama CTE Dual Credit (hore loogu yaqaan Tech Prep (Diyaarinta Farsamo) kuwaasi oo horseedi kara shahaado mihnadeed ama asoosiyayt digrii.
- Koorsooyin la kala doorto ee waafaqsan mihnadda iyo kulliyada aad danaynayo iyo barnaamijyada waxbarashada farsamo ee la baranayo.
- Kulliyadaha qaarkood waxay leeyihiin shuruudo dheeraad ah marka la galayo sida qaadashada **SAT** ama **ACT**.
- Ka feker qaadashada fasalada shuruudahaaga doorashada sida luqadda iyo/ama sayniska badan ee shaybaadhka.

JANAAYO: FASALKA 9 iyo 10



HELIDA DIYAARA: DHISKA MACLUUMAADKAGA KULLIYADA

Kulliyadaha keliya kama fekeraan darajooyinkaaga keliya ha ka fekerin fasaladaada. Waxay rabaan dalbadayaal wax ku soo kordhiya kambaska iyo/ama **bulshadda**. Hawlaha gaarka ah waxay kaa dhigi karaan codsade aad u tartan badan oo waxay kaa caawin karaan inaad dhiso khibradaada shaqo. Sidoo kale waa in lagu diiwaangaliyaa Qorshaha Dugsiga Sare iyo Kadib ee loo baahan yahay qalijebitna dugsiga sare.

MAXAY TAHAY DIIWAANKA HAWLAHA/KHIBRADA SHAQO?

Codsiyada qaarkood waxay u baahan yihiin diiwaanka hawaalaha/khibrada shaqada. Liiskan **hawlaha ka baxsan manhajka** waxa uu bixiyaa dareenka ku lug lahaantaada gudaha iyo wixii ka baxsan dugsiga. Waa inaad sidoo kale ku dartaa faahfaahingta gaaban ee ku lug lahaantaada hawl kasta.

NOOCEE HAWLO AH AYAAN RAACDAYNAYAA?

- Ciyaaraha fudud
- Barnaamijyada gelida kulliyada
- Adeega bulshadda
- Barmaajiyada ku salaysan caqiiqada/diinta
- Masuuliyadaha qoyska
- Shaqooyinka iyo tababarka xirfadaha
- Muusiga, riwaayada iyo fanka
- Barnaamijyada xagaaga
- Naadiyada dugsiga
- Arday dowlad

bilow inaad raad raacdo...

○ Raadiga roobadka _____
_____ nadax wayaha _____

○ tababarka xirfadaha **nakaaniga ah** _____
_____ laga bilaabo Janaayo ilaa _____

_____ Maarso 2017 _____

○ Logaaniyaha raadiga woods _____

Niyada ku hay:
Diiwaanka/khibrada shaqo ee hawlahaaga faa'iido ayay lahaan kartaa marka aad codsato **deeqaha waxbarashadda** iyo shaqooyinka.

WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Heerka **ka go'naanta iyo hogaaminta** hawlahaaga **aad ayay muhiim u yihiin** nidaamka dib u eegida oggolaanshaha **oo ka badan tirada hawlaha.**



MA JIRO WAKHTI?

Kulliyaduhu waxya fahmaan in arday badan ay hayaan shaqo, qoys iyo masuuliyado kale. Codsiiyo badan waxaa ka mid ah qaybta marka aad karto **inaad qorto wax ku saabsan naftaada ama duruufahaaga.** Tusaale ahaan, arday badan waxay u baahanyihiin inay ka shaqeeyaan shaqooyin badan si loo taageero qoyskooda. Tan waxaa looga fekeraa hogaanka.

Wadajaa khibradaada!

DIISAMBAR: FASALKA 9 iyo 10



HELIDA DIYAARA: DIYAARINTA SANADKAAGA SARE

Hambalyo! Waxaad ugu badnaan gaadhay sanadkaagii u dambeeyay ee dugsiga sare. Hadda **maaha** wakhtigii aad helaystay. Waxaad u baahan doontaa inaad samayso tiro waxyaabo ah si aad uga qalan jebiso dugsiga sare oo aad ugu diyaargarowdo kulliyada.

MAXAAN SAMAYNAYAA XAGAAGAN?

- Isku diiwaangeli SAT ama ACT imtixaanada.** Ka hubi la-taliyahaaga in aad u ogaato haddii labada midkood lagu bixiyo dugsigaaga.
- Booqo kulliyadaha** ama soo xaadir **carwooyinka kulliyada** oo la hadal kulliyada **la taliyayaasha oggolaanshaha.**
- Usamee jadwalka taariikhda** taariikhaha muhiimka ah iyo muddooyinka loo qabtay.
- Horumari liiska** doorashooyinka dhowr kulliyadoo (farasamada, 2-sano, 4-sano, tababarka xirafadaha).
 - Caddee doorashooyinkaaga sare ee kulliyada oo codso macluumaadka.
- Raadi oo codso deeqaha waxbarashadda.**
- U kaydi lacag** kharashyada kulliyada.

MAXAAN SAMAYNAYAA SANADKAYGA U SAREEYA?

Inaad samayso:

- Jadwal ka qabso iyo ballanka la talinta** la taliyahaaga ama macalinka gelita kulliyada.
- Haddii aad diiwaangashantahay koorsooyinka labbada buundo ah, **kala hadal macalinkaaga iyo la taliyaha** waxa ku saabsan qaadashada **AP, IB, ama Imtixaanka Kaambirij** si uu u shaqayto buundada kulliyada.
- Qaado SAT ama ACT.**
- Dhammaystir FAFSA ama WASFA** ee ka bilaabmaysa Oktoobar 1deeda sanadkaaga sare.
- Kala hadal **miisaaniyada kulliyada** ee qoyskaaga
- Shaqee si aad u sii wado ama **kordhi GPA** gaaga buundooyinka sanadka sare. Kulliyada iyo deeqa waxbarashadda waxay kaaga baahanyihiin inaad dirto dayrta IYO gu'ga **qoraalada darajooyinka rasmiga ah.**

ANIGU MIYAAN KU TAAGNAHAY DHABBADA QALANJEBINTA?

- * **Hubso** waxaad haysaa dhammaan buundooyinka aad u baahantahay si aad u qalanjebiso.
- * **Ka hubi caadi ahaanta** macalimiintaada waxa ku saabsan fasaladaada.
- * **Sii wad dhammaystirka shuruudaha kale ee qalanjebinta,** sida Qorshaha Dugsiga Sareyo wixii ka danbeeya.

ABRIIL: FASALKA 11

HA ISKA BOODIN!

Haddii aad hayso su'aalo, hubso inaad la hadasho la taliyaha, macalinka, baraha, filka ama xubinka qoyska kaas oo ku caawin karo inaad u diyaar garowdo ama kuu gudbiyo qof ku caawin kara.



DEEQDA WAXBAARASHO EE COLLEGE BOUND

CUTUBKAN:

**DEEQDA WAXBARASHO EE COLLEGE BOUND: DHAMMAAN
WAXYALAHA KU SAABSAN**

DEEQDA WAXBAARASHO EE COLLEGE BOUND: BALLANKA

DEEQDA WAXBAARASHO EE COLLEGE BOUND: KA GAL

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo si aad u aragto **qaamuuska**, eeg websaydka:

WCAN.ORG | PSCCN.ORG | READYSETGRAD.ORG | ROADMAPPROJECT.ORG

DEEQDA WAXBAARASHO EE COLLEGE BOUND: WAXYALAHA DHAMMAAN WAXA KU SAABSAN

WAA WAMXAY BOUND COLLEGE?

Deeqda waxbarasho Ee Bound College waa ballanka **kaalmada dhaqaale ee gobolka** ee **ardayda** u qalanta oo waa deeq waxbarasho oo afar sano ah (12 rubuc/8 simistar). Ardaydu waa inay codsadaan dugsiiga dhexe ka hor dhammaadka faasalkooda 8aad oo ay ballan ku qaadaan buuxinta Ballanka Bound College dugsiiga sare si ay u helaan deeq waxbarasho. College Bound waxay ku xidhaan **abaal marintaada warqadda** wadata kaalmada dhaqaale ee gobolka si loo daboolo kharashka waxbarashada (ee qiimaha kulliyada dad waynaha), kharashyada qaarkood iyo gunnada buugga yar. Wixii ah shuruudaha u qalmida collegebound.wa.gov

Deeqaha Waxbarasho ee Bound College

WUU DABOOLAA:

- Celceliska qiimaha **kharashka waxbarashadda** (qiimayasha kulliyada dad waynaha)
- Kulliyadaha qaarkood **kharashooda**
- Gunnada buugga yar

Deeqaha Waxbarasho ee Bound College

MA DABOOLLO:

- Guriyaynta
- Qorshaha cuntadda
- Gaadiidka
- Caymiska Daryeelka caafimaadka
- Kharashka aan khasabka ahayn

Kaalmada kale ee dhaqaale waxay caawin kartaa kharashyadan. Liiskan waa uu kala duwanaan karaa kulliyad ahaan.

HALKEE AYAAN KU ISTICMAALI KARAA?

Deeqda waxbarasho ee College Bound waxaa loo isticmaali karaa **wax ka badan 60 2- iyo 4- sano kulliyadaha dad waynaha iyo kuwa gaarka ah, jaamacaga iyo barnaamijyada farsamada** gudaha gobolka Washington.

Sanad dugsiyeedka 2018-2019 deeqda waxbarashada Bound College Deeqda Waxbarasho abaalmarinta qadarada waxay u eegyihiiin sidan:

Noocyada Kulliyada & Doolarka Deeqda Waxbarasho ee mustaqbalka Bound College

WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Waa inaad isticmaashaa Bound College Deeqaha Waxbarasho gudaha **1 sano** oo qalan jebinta dugsiiga sare.

Cilmi baadhida Kulliyadaha Dad waynaha 4-sano
(tusaale ahaan: University of Washington)
Ilaa \$11,009 sanadkiiba

Kulliyadaha Bulshadda iyo Farsamda (CTCS)
(tusaale ahaan: Spokane Community College)
Ilaa \$4,516 sanadkiiba

Kulliyadaha Gaarka ah 2-sano
(tusaale ahaan: Perry Technical Institute)
Ilaa \$4,516 sanadkiiba

FEBRAAYO: FASALKA 9 iyo 10

Kulliyada Dad waynaha Dhammayska tiran 4-sano
(tusaale ahaan: aamacadda Western Washington)
Ilaa \$7,515 sanadkiiba

Kulliyadaha Gaarka ah 4-sano
(tusaale ahaan: Pacific Lutheran University)
Ilaa \$11,904 sanadkii

Haddii aad hayso su'aalaha ku saabsan deeqda waxbarasho ee College Bound, fadlan la xidhiidha Washington Student Achievement Council

iimaylka collegebound@wsac.wa.gov,
888-535-0747 doorashada 1 ama booqo collegebound.wa.gov



3 DEEQDA WAXBAARASHO EE COLLEGE BOUND: BALLANKA

XUSUUSO WAKHTIGA FASALKA 7^{AAD} ama 8^{AAD}

Markeed sadeexday ballanka inaad tagto kulliyada? Adiga maanaan ku ilaabin. Halkan waxaa ah waxaad u baahantahay inaad ka ogaato wax ku saabsan ballanka Deeqda Waxbarasho ee Bound College.

- U qalma dakhli ahaan, sida lagu go'aamiyay kulliyadaada wadatana macluumaadka ka soo baxay **FAFSA kaaga** ama **WASFA**. Waxaad eegi kartaa shuruudaha dakhliga addoo booqanaya readysetgrad.org/cbs-mfi.
- Halagu aqbalo oo booqo mid ka mid ah wax ka badan 60 kulliyadood ama jaamacadaha ama barnaamijyada gudaha sanadka qalanjebinta dugsiga sare. Booqo readysetgrad.org/eligible-institutions liiska dhammayska tiran ee dugsiyada u qalma.

SIDEEN ANIGU KU HELAA?

Ka dib dhammaystirka codsiga dugsiga dhexe, ardayda u qalantaa waa inay dhammaystiraan **Ballanka Bound College**:

- Ardayda qalan jebisay ee gobolka Washington dugsigeeda sare ama barnaamijka dugsiga guriga wata ugu yaraan 2.0 GPA. Haddii aad ku jirtay goobta barbaarinta wakhti kasta ka dib fasalka 7aad, fadlan booqot readysetgrad.org/fostercare si aadu barato wax badan oo ku saabsan doorashooyinka dheeraadka ah.
- Ma laha **Fal dambiyeed lagu xukumay**.

BOUND COLLEGE MUUQAALKA GUUD

Deeqda waxbarasho ee Bound College waa ballanka **kaalmadda dhaqaale ee gobolka** si **loogu** qalmo ardaydu inay daboolaan kharashka celiska waxbarashada (ee qiimayaasha kulliyada dad waynaha), kharashka kulliyada qaarkiis iyo gunnada buugga yar oo waa deeq waxbarasho oo afar sano ah (12 rubuc/8 seemistar (Siminaar)). Ardaydu waa inay codsadaan dugsiga dhexe ka hor dhammaadka faasalkooda 8aad oo ay ballan ku qaadaan buuxinta Ballanka Bound College dugsiga sare si ay u helaan deeq waxbarasho. College Bound waxay ku xidhaan **abaal marintaada warqadda** wadata kaalmada dhaqaale ee gobolka si loo daboolo **kharashka waxbarashada** (ee qiimaha kulliyada dad waynaha), **kharashyada** qaarkood iyo gunnada buugga yar.

Haddii aad hayso su'aalaha ku saabsan College Bound Scholarship, fadlan la xidhiidha Washington Student Achievement Council iimaylka collegebound@wsac.wa.gov, 888-535-0747 doorashada 1 ama booqo collegebound.wa.gov

* WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Waa inaad isticmaashaa Deeqda Waxbarasho ee College Bound. gudaha qalan jebinta 1 sano oo dugsiga sare ah.

FEBRAAYO: FASALKA 9 iyo 10

KA HEL WARARKA:

Ku biir si aad u hesho wararka cusuh ee Deeqda Waxbarasho ee Bound College iyo qaababka kale ee lagu helo u diyaar ah kulliyada addoo booqanaya: bit.ly/2gIM56L



3 DEEQDA WAXBARASHO EE COLLEGE BOUND: HELIDA IYADDA

Waad qalan jebinaysaa oo waxaad tegaysa akulliyada. Waa wakhtiga la bilaabay in laga fekero wax ku saabsan waxa aad u baahantahay inaad samayso si aad u hesho Deeqda Waxbarasho ee College Bound. Waxaa jira foomam la buuxinayo iyo muddooyinka si loo buuxiyo, oo waa muhiim adiga iyo qoyskaagu inaad fahantaan nidaamka.

MAXAAN U BAAHANAHAY INAAN SAMEEYO:

1. Buuxi shuruudaha Deeqada Waxbarasho ee Bound College.
2. Soo xaree **FAFSA** ama **WASFA**. Waxaad soo gudbin kartaa goor hore sida Oktoobar 1 sanadkaaga sare. Xusuuso in kulliyad kasta ay leeyihiin muddooyinkooda ay qabteen ee kaalmada dhaqaale ee aad raacayso.
3. Laguu oggolaado inaad iska diiwaangeliso kulliyad gudaha Washington gudaha hal sano oo qalan jebinta dugsiga sare ah.
4. Ahaw qof muwaadin Maraykan ah, qof u qalma oo aan muwaadin ahayn, ama qof buuxiyay shuruudaha degganaanshaha ee gobolka.

KULLIYADAADU MAXAY QABAN DOONTAA?

1. **Go'aan ka gaadh** haddii dakhligaagu buuxiyo tilmaamaha u qalmida.
2. **Xisaabi** abaalmarintaada kaalmada dhaqaale.
3. **Dir** warqadaada abaalmarinta kaalmada (iimayl ahaan ama boostadda) addoo sheegaya inta ay leegtahay kaalmada dhaqaale ee aad heli doonto.
4. **Ku kharash garee** kaalmadaada **dhaqaale** adigu, ay ku jirto Deeqda Waxbarasho oo Bound College, ka hor inta aanay fasaladu bilaabin.

Haddii aanad helin "iimaylkaaga waafaqsan" kugu wargelinaya in codsigaaga Bound College uu waafaqsanaa FAFSA ama WASFA haaga, wac **888-535-0747** (doorashada 1) ama iimayl **collegebound@wsac.wa.gov**

MAXAA DHACAY MARKA XIGTA:

- Bound College waxay kuu soo diri doontaa **"iimaylka waafaqsan"** ee kugu wargelinaysa marka FAFSA ama WASFA ay waafaqsantahay codsigaaga asalka ah ee Bound College.
- Bound College waxay si toos ah u aqoonsan doontaa adiga sidii ardayga Bound College dhammaan kulliyada aad iska qortay FAFSA ama WASFA.

WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Ardaydu waa inay codsadaan Bound College dugsiga dhexe ka hor dhammaadka faasalkooda 8aad oo ay ballan ku qaadaan buuxinta Shuruudaha Bound College dugsiga sare si ay u helaan deeq waxbarasho. College Bound waxay ku xidhaan abaal marintaada warqadda wadata **kaalmada dhaqaale ee gobolka** si loo daboolo **kharashka** waxbarashada (ee qiimaha kulliyada dad waynaha), **kharashyada** qaarkood iyo gunnada buugga yar.

JANAAYO: FASALKA 11 iyo 12



LAGU BIXINAYO QARASHKA KULLIYADA

CUTUBKAN:

QAABABKA LAGU BIXIYO LACAGTA KULLIYADA

DEEQDA WAXBARASHO

WAXYALAHA KU SAABSAN DHAMMAAN FAFSA

WAXYALAHA KU SAABSAN DHAMMAAN WASFA

**FAHANKA WARQADDAHA ABAAL MARINTA KAALMADA
DHAQAALE**

LAGU BIXINAYO KULLIYADA: QAABABKA LAGU BIXIYO LACAGTA KULLIYADA

IMISA AYAY KHARASHKEEDU YAHAY?

Kharashyada kulliyadu way kala duwanyihiin dugsiyada kala duwan. Kulliyad kasta waxay ku qiyaastay **Kharashka Soo xaadirka (COA)** iyaddoo isku daraysa qayb ama dhammaan kharashka hoose:

**Kharashka
waxbarashadda
Kharashka**

Goobta iyo raacida
Gaadiidka

Buuggata iyo saadka
Kharashyada kale ee nolosha

SIDEEN AYAAN KU XIYAA IYADDA?

Kharashka kulliyada waxa uu noqon karaa mid aad u bata, laakiin waxaa jira ila badan oo kala duwan oo kaa caawiya inaad bixiso kharashka kulliyada. Dadku inta badan waxay isticmaalaan ilo kala duwan oo kaalmo dhaqaale ah si ay ugu bixiyaan kulliyada marka lagud aro waxay kaydsadeen ama ka shaqaysteen shaqada. Ilaaha Kaalmada dhaqaale waxaa ka mid ah **deeq kasta ama deeq waxbarasho, amaah, ama barashada shaqada** la siiyay si ay kaaga caawiso adiga inay buuxiso kharashka kulliyada.

SIDEEN UGU HALEELI KARA?

Kaalmada Dhaqaale

- Si lagaaga fekero kaalmada dhaqaale, waxaad u baahantahay inaad dhammaystirto **FAFSA** ama **WASFA** sanadkaaga sare iyo sanad kasta marka aad kulliyada ku jirto.
- Kulliyad kastaa waxay go'aan ka gaadhaa u qalmida kaalmada dhaqaale ee federaalka, gobolka iyo noocyada hay'ada kaalmada ku salaysan xeerarka abaal marinta goobta waxbarashadda.

Deeqda waxbarasho

- Waxaa jira kumanyaal deeqda waxbarasho ee ku caawin kara adiga inaad ku bixiso kulliyada. Deeqa waxbarho kala duwan waxay leeyihiin codsiyo kala duwan. Badanka deeqaha waxbarashada waxay u baahanyihiin inay dhammaystiraan **FAFSA** ama **WASFA**.

NOOCYADA KAALMADA DHAQAALAHA:

Deeqda waxbarasho – lacagta lagu abaal mariyo ardayda ee ku salaysan tacliinta ama guul gaadhida kale si loo caawiyo inay iska bixiyaan kharashka waxbarashadda. Deeqda waxbarasho din lacagteeda looma bixinayo.

Deeqda – Qaabka kaalmada hadiyada, caadi ahaan ku salaysan baahida dhaqaale. Deeqda waxbarasho dib looma bixiyo lacagteed, tusaale ahaan, waxaad ka noqotay dugsi oo waxaa lagugu yeeshaa lacag celin.

Daraasada Shaqo – Barnaamijka kaalmada dhaqaale (federaalka ama gobolka) u oggolaata ardayga inuu ka shaqeyo goobta ama loo shaqeyayaasha ka baxsan goobta waxbarasho si loo shaqaysto lacag lagu bixiyo **kharashka kulliyada**.

Amaahda – Lacagta aad ka amaahan karto oo dib u bixin karto wakhti ka dib, leh xiisaha lagu daray xaaladaha badankooda.

KU HAY NIYADA:

Garashada noocyada kala duwan ee kaalmada dhaqaale waa tallaabada keliya. Waxaad u baahan kartaa inaad qaadato kaalmada dhaqaale si loo daboolo kharashka buuxa ee soo xaadirka.

ABRIIL: FASALKA 9 iyo 10
DIISAMBAR: FASALKA 11



4 LAGU BIXINAYO KULLIYADA: DEEQDA WAXBARASHO

MAXAY TAHAY DEEQAHA WAXBARASHO?

Lacagta abaal marinta deeqda waxbarasho ee kharashyada waxbarashadda ku salaysan heerka sida tacliinta, ciyaaraha fudud, adeega bulshadda ama baahida dhaqaale. Ururada bulshadda, kulliyadaha, machadyada diinta iyo shirkadaha gaarka ah waa tusaalooyinka bixiyayaasha deeqda waxbarasho.

Iyadoon loo eegin asalka laga soo jeedo ama **heerka sharciga socdaalka**, waxaa dhici karta deeq waxbarasho oo adigu hesho.

HALKEEN KARAAN INAA KA RAADIYO DEEQAHA WAXBARASHO?

La taiyahaaga dugsiga sare waa meesha fiican ee laga bilaabo. Waa kuwan meelaha qaar laga bilaabo cilmibaaristaada:

TheWashBoard.org: thewashboard.org

FastWeb: fastweb.com

Beyond Dreaming Scholarship List:
scholarshipjunkies.org/beyond

Kulliyada aad xiisaynaysaa ama ururada maxaliga ah sida Act Six, College Success Foundation iyo Washington State Opportunity Scholarship.

Waxaad mutaysan kartaa mid kamid ah barnaamijyadan gobolka sida College Bound Scholarship (Cutubka 3) ama Passport to Careers.

SIDEEN U CODSADAA?

1. **Cilmi baadhid ku samee** deeqaha waxbarasho ee aad u **qalanto** ee.

2. **Soo gudbi** codsiyadaada **adigu**. Hubso inaad u raacdo tilmaamaha si feejigan!

3. **Dhammaystir** Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayga ee Federaaliga (**FAFSA**) ama Codsiga Washington ee Kaalmada Dhaqaale ee Gobolka (**WASFA**).

MAXAY YIHIIN NOOCYADA DEEQDA WAXBARASHO EE AAN CODSAN KARO?

Tacliimeed/Meritka: Iyaddoo ku salaysan GPA, buundooyinka imtixaanka iyo/ama shaqada kooraska

Ciyaaraha fudud: Iyaddoo ku salaysan bandhiga ciyaaraha fudud

Hal abuur leh: Iyaddoo ku salaysan fanka, muusiga, ciyaarta

Adeega bulshadda: Iyaddoo ku salaysan ka qayb galka dugsigaaga ama bulshadda

Kala duwanaanshaha: Ku salaysan sinjiga, isirka, dhaxalka qoyska, diinta, qaabka galmada, iwm.

Baahida: Ku salaysan baahida dhaqaale

Kale: Hogaaminta, ardaygii hore, iwm.

FEBRAAYO: FASALKA 11

DIISAMBAR: FASALKA 12

* SAMEE CILMI BAADHID

Gudaha deeqda waxbarasho dib loo cusboonaysiin karo? Haddii Jawaabtu tahay haa, baro wax ku saabsan shuruudaha cusboonaysiinta. Haddii aanahy ahayn, ka feker wax ku saabsan sida aad u beddeli doonta maaliyada sanadka soo socda.

Ma la qaadi karaa? Ma qaadan kartaa deeqda waxbarasho adigu haddii aad **beddesho** dugsiyada? Deeqaha waxbarashada qaarkood waxay ku xidhinyihiin kulliyado gaar ah.



LAGU BIXINAYO KULLIYADA:

DHAMMAAN KU SAABSAN FAFSA

MAXAY TAHAY FAFSA?

Buuxinta FAFSA waa bilaasha oo waxay ku siisaa gelida goonto ka sii wayn oo kaalmo dhaqaale ah si aad u bixiso tababarka shaqada, farsamada, 2-sano iyo 4-sano oo kulliyada ah. Iyaddoo ku salaysan macluumaadka aad bixiso, kulliyad kasta waxay xisaabin doontaa abaal marinta kaalmada **dhaqaale**.

Codsiga Xortaha ah ee Kaalmada Ardayga Federaalka (FAFSA) waa tallaabada koowaad ee lagu codsado **kaalamda dhaqaale**.

GOORMA YAAN COSANAYAA?

Goor hore oo ah **Oktoobar 1 sanadkaaga sare**.

Hubso **garo kaalmada dhaqaale ahmiyada muddada ay dhacayso** wixii ah kulliyadaha aad xiisaynayso.

Waxaad u baahantahay **inaad gudbiso FAFSA sanad kasta** markaad kulliyada ku jirto.

KUMAA U QALMA INUU CODSADO?

Mudaaninka Maraykanka ah iyo dadka sifada sharciga ah ku degen waa inay buuxiyaan FAFSA.

Qaar ka mid ah arayda aan sharciga lahayn **way**

galmaan Codsiga Washington ee Kaalmada Dhaqaalaha Gobolka (**WASFA**). **Ka eeg "Dhammaan waxa ku saabsan WASFA" qormada wixii macluumaad dheeraada ah.**

MAXAY TAHAY MACLUUMAADKA AAN U BAAHANAHAY INAAN BIXIYO?

Macluumaadka bilowga ah, sida magaca sharciga, taariikhda dhalashada, iwm (iyo wixii mid ah).

Waalidka iyo ardayga **cashuurta/macluumaadka** dakhliga Liiskaaga **kulliyadaha**

MA U BAAHANAHAY AQOONSIGA FSA? (AQOONSIGA KAALMADA ARDAYGA FEDERAALKKA)

Aqoonsiga FSA waxa uu ku siiyaa gelita macluumaadka FAFSA oo u adeegaa sidii

saxeexaaga sharciga ah. Adiga IYO hal waalid (waalidka ku dhala ama ku korsada) waxaad u baan doontaa inaad samayso aqoonsiga FSA (magaca isticmaalaha iyo kelmadda sirta ah). Hubso adiga iyo waalidkaaga inaad isticmaashaan iimaylo kala duwan. Haddii waalidkaagu aanu ka diiwaan gashanayn waa inay samaystaan Aqoonsiga FSA. Taa beddel keed waxay daabaci doonaan, saxeex oo boosta ku dir bogga saxeexa.

Macluumaadkee ayaan ubaahanahay inaan kusameeyo Aqoonsiga FSA? Macluumaadka bilowga ah, sida lambarka sooshalka (SSN), magaca sharciga ah, taariikhda dhalashada, macluumaadka xidhiidhka, iwm.

* HA I LOOBIN:

Hubso inaad qorto jawaabaha su'aalahaaga caqabada ah ee codsiga oo ku kaydi iyaga goobta amniga ah ee aqoonsigaaga FSA.

SIDEEN U BUUXIYAA IYADDA?

1. Samee Aqoonsiga Kaalmada Ardayga Federaalka ah (FSA Aqoonsiga) bogga **fsaid.ed.gov**.
2. Isticmaal Aqoonsiga FSA si aad ku soo gadho oo ku dhammaystirto FAFSA **fafsa.gov**.
3. Eeg iimaylka kuu sheegaya inaad ku guulaysatay gudbintii FAFSA.

MAAYO: FASALKA 11
SEBTAMBAR: FASALKA 12



LAGU BIXINAYO KULLIYADA:

DHAMMAAN KU SAABSAN WASFA

MAXAY TAHAY WASFA?

Codsiga Washington ee Kaalmada Federaalka (WASFA) waa tallaabada koowaad ee lagu codsado **kaalmada dhaqaale** ee qayb ardayda aan sharciga lahayn ah kuwaas oo ku nool gobolka Washington. Buuxinta WASFA waa bilaash oo waxay ku siisaa ardayda u qalanta helida **kaalmo dhaqaale ah** si ay u bixiyaan tababarka shaqada, farsamada, 2-sano iyo 4-sano oo kulliyadaha ku yaala Washington. Ardayda bilaa sharciga ah ama sharciga leh (**DACA**) waa inay dhammaystiraan WASFA. **Haddii aad tahay Muwaadin Maraykan ah ama qof sifo sharci ah ku degen, ka eeg qormada "Ku saabsan dhammaan FAFSA" oo ha buuxin WASFA.**

KUMAA U QALMA INUU CODSADO?

U qalmida waxay ku salaysantahay **sharciga socdaalka la haysto**. Ardaydu waa inay buuxiyaan shuruudaha barnaamijka degnaanshaha. Waxyaabaha gaarka ah, isticmaal su'aalaha xog qaadista u qalmida ee readysetgrad.org/wasfaelig

SIDEEN U BUUXIYAA IYADDA?

1. Booqo readysetgrad.org/wasfa oo riix "Bilaw WASFA Cusub."
2. Dhammaystir su'aalaha xog qaadista xaq u lahaanshaha.
3. Samayso kooto oo kaydi erayga soo gelida iyo kelmadda sirta ah.
4. Buuxi oo soo gudbi codsigaaga.

Maxay tahay saxeexa waalidka ee WASFA? Waxaad u baahan doontaa inaad iimayl marti qaad ah u dirto mid ka mid waalidka (dhalay ama korsaday) si koronto ahaan loogu saxeexo WASFA. Hubso adiga iyo waalidkaaga inaad isticmaashaan iimaylo kala duwan.

- * **Ha ilaabin:** Saxeexa waalidkaaga waxaa looga baahan yahay in la dhammaystiro codsigaaga.
- * **Waalidka waa inay koronto ahaan saxeexaan gudaha 72 saacadood marka la marti qaado.**

GOORMA AYAAN SAMAYNAYAA?

Soo gudbi goor hore oo ah **Oktoobar 1 sanadkaaga sare.**

Iska hubso **inaad taqaano kaalmada dhaqaalaha Ahmiyada muddooyinka liio qabtay** xaga kulliyada aad xiisaynayso. (Inta badan muddada ay dhacayso WASFA ma qorna, laakiin waxay la mdi tahay muddada ay dhacayso FAFSA.)

Waxaad uga baahantahay inaad **gudbiso WASFA** sanad kasta markaad kulliyada ku jirto.

MAXAY TAHAY MACLUUMAADKA AAN U BAAHANAHAY?

Macluumaadka bilowga ah, sida magaca sharciga, taariikhda dhalashada, iwm.

Waalidka iyo ardayga **cashuurta/macluumaadka dakhliga**

Liiskaaga **kulliyadaha** (kulliyadaha gobolka Washington oo keliya)

Lambarkaaga **DACA** haddii aad mid leedahay

Miyuu macluumaadkaygu ilaashanyahay?

Gollaha Guul gaadhida Ardayga Washington (WSAC) iyo kulliyadaha hela codsigaaga keliya waxay u isticmaalaan macluumaadka inay go'aansadaan u qalmida kaalmada dhaqaale ee gobolka. Goobaga waxbarasho looma oggola inay isticmaalaan macluumaadka wixii ah ujeedooyinka ama la wadaagaan xogta kooxaha kale.

Haddii aad hayso su'aalo ku sabasan WASFA, kala xidhiidh Washington Student Achievement Council (WSAC) lambarka 1-888-535-0747, doorashada 2 ama iimaylka wasfa@wsac.wa.gov.

MAAYO:
FASALKA 11
SEBTAMBAR:
FASALKA 12



LAGU BIXINAYO KULLIYADA: FAHANKA WARQADDAHA ABAAL MARINTA KAALMADA DHAQAALA

Ka dib markaad soo xarayso FAFSA ama WASFA, waxaad heli doontaa warqadda abaalmarinta kaalmada dhaqaalaha ee ka soo baxday kulliyad kasta oo aad codsatay. Kaalmadaada **dhaqaale** abaalmarin ka timid kulliyad kasta way kala duwanaa doontaa. Ma garan doontid ka uu yahay dugsiga ku habboon miisaaniyadaada ilaa aad dib u eegto DHAMMAAN kaalmadaada dhaqaale **xidhmooyinka** abaalmarinta.

NOOCYADA AMAAHDA ARDAYGA:

Waxaad dooran kartaa si buuxda ama qayb ahaan inaad u aqbasho noocyada kala duwan ee amaahda la bixiyo ama diid dhammaan iyaga.

Amaahda kaabbida leh: Dowladdu waxay bixisaa dulsaarka marka aad ku jirto kulliyada. Haddii aad u qalanto, tani waa doorashadaada ugu wanaagsan.

Amaahda kaabbida aan alahyn: Dulsaarka waxaa lagu daraa qadarka aad amaahdo sida ugu dhakhsaha badan ee aad bilowdo kulliyada.

Amaahda walaidka: Amaahda uu waalidkaagu qaadan karo isagoo ku metelaya si uu u bixiyo **kharashkaaga kulliyada**. Waalidkaagu waxay sharci ahaan ku xidhan yihiin amaahda iyo dib u bixintooda.

Amaahda federaalka waxay leedahay dulsaar aad u hooseeya iyadoorashooyinka dib u bixin kara wanaagsan amaahda gaarka ah oo waxaa go'aamisa FAFSA.

Amaahda gaarka ah waxay ka soo noqon kartaa bangiga, kulliyada iyo ururada gaarka ah. Caadi ahaan, waxay leeyihiin qiima dulsaar oo ka sareeya iyo doorashooyinka dib u bixinta ka wanaag yar. Sida amaahda aan la kaabin, amaahda gaarka ah waxay heshaa dulsaarka sida ugu dhakhsaha badan ee ad ka amaahato lacagta.

NOOCYADA KAALMADA DHAQAALAH:

Deeqaha waxbarasho: Lacagta lagu abaal mariyo ee ku salaysan tacliinta ama guul gaadhida kale si loo caawiyo lagu bixiyo kharashka waxbarashadda.

Deeqaha: Qaabka kaalmada hadiyada, caadi ahaan ku salaysan baahida dhaqaale.

Daraasada shaqo: Shaqada ka baxsan goobta waxbarasho ama goobta waxbarasho ee kuu oggolaatra adiga inaad shaqaysato **kharashyada waxbarashadda**.

Amaahda: Lacagta aad amaahato ee aad dib u bixinayso wakhti ka dib iyaddoo wadata dulsaar.

Waxaan helay warqaddayda abaal marinta, MAXAY HADDA?

1. Dib u eeg deeqda oo barbar dhig kharashka aad u baahantahay inaad daboosho. Kharashyada qaar ku qoran **kharashka soo xaadirka** (COA) waxaa biil u soo diri doona kulliyada **kharashka waxbarashadda**, qolka amna meelaha la wada seexdo, iwm) marka kuwa kale, sida buuggaagta iyo kharashyada gaarka ah ay yihiin qiyaaso lagu taliyay.

2. Ku wargeli kulliyada isbeddlo kasta iyo deeqaha waxbarashadda gaarka ah marka la gudbiyo **FAFSA daada ama WASFA**.

3. Aqbal abaalmarinta kulliyada aad codsanayso si aad u xaadirta. Hubso inaad tyaqaano waktiyada ay dhacayso ee aqbalida deeqda kaalmada dhaqaale.

WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Aqbal deeqaha, deeqaha waxbarasho iyo daraasada shaqada ka hor amaahda si loo yareeyo daynkaaga kulliyada ka dib. Iska ilaali amaahda gaarka ah iyo kaadhahka kiridhitka, haddii ay suuragal tahay.

COA (Kharashka Soo Xaadirka)
- Deeqaha waxbarasho/Deeqaha
GAL DALOOLADA LACAGTA
(daraasada shaqada/amaahda/kaydka)
GAL DALOOLADA LACAGTA ugu yar =
WAXAY LA MID TAHAY DOORASHAD ALA
AWOODO

4. La xidhiidh xafiiska **kaalmada dhaqaale** ee kulliyada haddii aad hayso su'aalo.

FEBRAAYO:
FASALKA 12



CODSANAYA KULLIYADA

CUTUBKAN:

CILMI BAADHIDA KULLIYADAHA

QAYBAHA CODSIYADA KULLIYADA

SIDA LOO CODSANAYO

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo si aad u aragto **qaamuuska**, eeg websaydka:

WCAN.ORG | PSCCN.ORG | READYSETGRAD.ORG | ROADMAPPROJECT.ORG

5 CODSANAYA KULLIYADA: CILMI BAADHAYA KULLIYADAHU

SIDEEN CILMI BAADHIDA UGU SAMEEYAA KULLIYADAHU?

- Booqo: wcan.org/resources/college-map liisaska kulliyadaha gobolka Washington
- Eeg websaydka kulliyadaha
- Ku biir liiska warqaddaha la soo diro ee kulliyada
- Soo xaadir **carwooyinka kulliyada**
- Booqo kulliyadaha

Baadhida kulliyadu waxay qadataa wakhti. Qorshee dhowr saacadood todobaadku si aad uga shaqayso cilmi baadhida kulliyadaha.

MAXAY TAHAY IN AAN ANIGU KA FEKERO?

Noocyada kulliyada – farsamo, 2-sano, 4-sano

Goobta – fogaanta gurigha, cimilada, magaalo ama miyi, iwm.

Digriiyada la heli karo – **asooshiyatka, bekelooriyada, shahaadooyinka** iyo **tababaka shaqada**

Barnaamijyada la heli karo – dhinacyada maadada ama **maadada xooga la saaro** ee la bixiyo

Dadwyanaha leeyahay oo ku lid ah kuwa gaar ah – kulliyadaha dad waynaha qayb ahan waxaa lacagta bixiya dowlada lacagteeda oo kulliyadaha gaarka ah si toos dad waynahu uma maalgeliyaan

Xoog saarida gaarka ah – kliyaddaha xooga saara xiise gaar aha ardayda mujtamaca sida fanka, sinjig akeliya, diin ahaan ku xidhan iyo kulliyada hawlgalka la gaaryeelay

Kala duwanaanshaha – noocyada dhaqanada, luqaddaha iyo macluumaadka dadka ay wakiil ka tahay gobta waxbarashadda ama gudaha bulshadda

Cabbirka – tirada ardayda, cabbirka goobta banaanka kulliyada, cabbirka fasalka, mujtamaca magaalada, iwm.

Kharashka soo xaadirka – gudaha ama ka baxsan gobolka **kharashka waxbarashadda**, kulliyada **kharashayada**, buuggaagta, taagiid raaca iyo guriyaynta

Xulashada – ay qiyaastay boqoliiba intay tahay ardaytda la aqbalo iyadodo ku salaysan shuruudaha aqbalaada

Heerka qalan jebinta – tirada ardayda ka qalan jebisa gudaha 4 ama 6 sanadood kulliyadaad

WANAAGSAN IN LA

OGAADO: Kulliyada bulashaddu waxay bixiyaan 2-sano oo digrii ah oo leh dhabada **lagu wareejinayo** ilaa 4-sano dugsi ah iyo qaar bixiya barnaamijyada digriiga bekelooriyada.

HA ILOOBIN:

Ka feker shuruudaha aqbalaada oo go'aan ka gaadh haddii dugsigu uu kuu yahay **gaadhida, mid adag**, ama **badbaado** adiga. Waxaa lagu talinayaa inaad codsato ugu yaraan hal dugsi qayb kasta:

Gaadh – Waxaa dhici karta inaanad gelin, laakiin waay ku xaq mudantahay in la codsado sababtoo waariyadii dugsigaaga

Adag – Waxaad tahay codsade tartan badan oo suuragal ahaan waa lagu aqbali doonaa

Badbaadada – hubaal ahaan waa lagu aqbali doonaa, oo waa taageerada kiiska kuwa kale ee aan shaqayna

LA HADAL:

Kulliyada iyo xarunta lataliyaha mihnada

Kulliyada **oggolaanshaha la taliyaasha** ama wakiilada booqday dugsigaaga

Xubnaha qoyska, macalimiinta, barayaasha iyo Xubnaha bulshadda kulliyada ku jiray

NOOFAMBAR:
FASALKA 11



5 CODSANAYA KULLIYADA: QAYBAHA CODSIYADA KULLIYADA

Dhammaan kulliyadaha waxay leeyihiin **codsi**. Caadi ahaan, waxaad soo gudbin kartaa mid xirfad ah, farsamo, 2-sano ama 4-sano kulliyad/jaamacad codsi onlayn ah oo wakhiyada qaarkodd qof ahaan ah, ama boosta.

MAXAAN U BAAHANAY SI AAN U CODSADO KULLIYADAHAA BADANKOODA?

Qolaadaada darajooyinka rasmiga ah laga bilaabo **dugsiga sare** iyo kulliyada hadii aad shaqaysatay buundo

Buundooyinkaaga imtixaanka laga bilaabo **SAT ama ACT**

WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Barnaamijyada qaarkood sida **tababarka shaqada**, tababarka xirfada iyo caddaymaha farsamada waxay leeyihiin qaab gooni ah oo codsi ah. Ka eeg **Ini.wa.gov** wixii macluumaad dheeraada ah ee ku saabsan tababarka shaqada ama booqo **sbctc.edu** barnaamijyada tababarka xirfadaha ama farsamada.

* HA ILAABIN:

Waxaad la tartamaysaa codsadayaal BADAN oo kale. Hubso jawaabahaagu inay cad yihiin oo yihiin wakiilka runta ah ee cida (qofka) aad tahay iyo sida aad naftaada u diyaarinayso!

TALLAABOYINKEE DHEERAADKA AH AYAA LOO BAAHAN KARAA INAAN DHAMMAYSTIRO 4-SANO CODSIGA KULLIYADA?

Warbixinta Gaarka ah – qaabka kulliyada si loo ogaado adiga iyo sababta aad u xiisaynaso dugsiga

Jawaabaha Su'aasha Gaaban – su'aalo dheeraad ah oo xooga saaraya fikro gaar ah, sida kala duwanaanshaha, dhaqanka iyo tusaalooyinka sii wadista/ ka gudbida kala duwanaanshaha.

Diiwanka hawsha/Khinrado shaqo – liiska **hawlaha manhajka ka baxsan** oo ay ku jiraan naadiya, ciyaaraha, shaqooyinka iyo wax kasta oo aad qabto oo ka baxsan dugsiga.

Warqadda kula talinta – warqad ka socota macalinta, la taliyana, tababaraha, wim, oo ka hadlaysa tayoooyinkaaga, sifooyinka iyo kartiyaha.

WAX KALE?

Waxaad u baahan kartaa inaad bixiso khidmad si aad u gudbiso codsiga kulliyada.

Si kastaba ha ahaatee, waxaad u qalmi kartaa inaad hesho ka dhaafida khidmada:

- Haddii aad tahay araday Deeqda Waxbarasho ee Bound College
- Haddii aad hesho qado bilaasha ah ama qiimaha la dhimay
- Haddii aad ka qayb gasho barnaamijyada sida TRiO, Upward Bound, ama GEAR UP
- Haddii aad tahay dhalin yaro daryeelka korinta ku jira
- Haddii aad qaadatay SAT ama ACT oo leh khidmada ka dhaafida
- La xidhiidh la taliyahaaga dugsiga sare, xafiiska qaabilaada kulliyada, Ururka Qaranka ee La talinta Qaabilaada Kulliyada, ama Guddida Kulliyada si aad wax uga waydiiso wixii ku saabsan khidmada ka dhaafida.

MAARSO:
FASALKA 11
OKTOOBAR:
FASALKA 12



5 CODSANAYA KULLIYADA: SIDA LOO CODSANAYO

TILMAMAHA CODSASHADA:

Buuxi oo gudbi ugu yaraan saddex codsiyada **kulliyada** inta dayrta lagu jiro.

Codso kaalmada dahqaale addoo buuxinaya **FAFSA** ama **WASFA** goor hore oo Oktoobar 1 ah si loo hubiyo inaad leedahay doorashooyinka lagu bixiyo kulliyada.

Isticmaal cinwaanka iimaylka xirfad yaqaanka wadata magacaaga. Inta badan iimaylkaaga eeg, waxaad heli doontaa fariimo, muhiim ah wakhti xasaadi ah.

La hadal lataliyahaaga haddii aanad awoodin inaad bixiso kharashka codsiga. Waxaad u qalmi kartaa **codsiga kulliyada ka dhaafida kharashka**.

Raad raac muddooyinka loo qabtay isticmaalka xaashida egsalka ama liiska waxa la qabanayo.

Khaladka ka eeg, ka sax khaladka oo dib u eeg curisyada kulliyada. Qof kale ha kula (bare, la taliye, macalin, iwm) eeg codsigaaga la soo gebagebeeyay.

Eego heerka kulliyadaada iyo abka kaalmada dhaqaale si loo hubsado in aan la helin. Caadi ahaan tan waxaad ku samayn kartaa **onlaynka ah ee kulliyada**, iimaylka ama telefoonka.

Hubso **inaad kaydiso dhammaan qaybaha codsiga kulliyada**; waxaad aqood u yeelan doontaa inaad dib u isticmaasho kulliyadaha kale ama codsiyada deeqda waxbarasho.

Ka dib markaad gudbiso **codsigaaga**, waa inaad heshaa **fariinta xaqiijinta**. Haddii aanad, la xidhiidh xafiiska qaabildaa kulliyada si aad u ogaato heerka codsigaaga.

WAA MAXAY CODSIGA CAADIGA AH?

Codsiga caadiga, ama abka caadiga ah, waa qaabilaada kulliyada **codsiga ay isticmaalaan wax ka badan 700 oo kulliyadoo gudaha Maraykanka**, ay ku jirto kulliyadaha gaarka ah ee Washington. Marka abka guud la dhammaystiro, waxaa loo diri karaa tiro kasta oo kulliyadaha ka qayb gelaya ah. Abka guud waxaa gaar ahaan loogu isticmaalaa u qalmid 4-sano kulliyada iyo jaamacadaha. Si aad u bilowdo codsiga caadiga ah, booqo **commonapp.org**.

2-SANO KULLIYADA NIDAAMKA CODSIGA:

Ka codso onlayn, boostada ama qof ahaanby.

U gudbi FAFSA ama WASFA.

Qaado **imtixaanka meelaynta** xaga kulliyada. Kulliyadaha qaarkood sidoo kale waxay aqbalaan qoraalada buundooyinka ama macluumaadka kale si ay u go'aamiyaan meelaynta.

Jadwal ka samayso **la talinta tacliimeed** ballanka.

4-SANO KULLIYADA NIDAAMKA CODSIGA:

Gudbi FAFSA ama WASFA haaga.

Akhri shuruudaha qaabilaada dugsi kasta oo gaar ah.

Samee kooto codsigaaga onlaynka ah.

Codso **warqaddaha lagu amaanay**.

Codso **qoraalada buundooyinka rasmiga** ah.

Dir buundooyinka SAT ama ACT.

Oor ama wax kabeddel **buundooyinkaaga gaarka ah** curisyada iyo **jawaabaha jawaabta gaaban ee kale**.

Dhammaystir oo gudbi codsigaaga kulliyada.

Hel **iimaylka xaqiijinta** kaas oo codsigaaga si guuled loo gudbiyay.

NOOFAMBAR:
FASALKA 12



ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA

CUTUBKAN:

GAADHIDA GO'AANKAAGA

U WAREEGIDA KULLIYADA

WAXA LA FILAYO XILIGAAGA HORE

ILAHA KULIYADA EE AAD U BAAHANTAHAY INAAD ISTICMAAHSO

ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: GAADHIDA GO AANKAAGA

Waxaad soo gudbisay codsiyadaada **kulliyada** oo hadda sugida ciyaartu way bilaabantaa. Tani waxay qaadan kastaa meel kasta laga bilaabo bilaa ilaa dhowr bilood, iyaddoo ku xidhan nooca dugsiga. Kulliyaduhu suuragal ahaan waxay la xidhiidhi doonaan go'aankooda dhexda iimaylka, boostada ama madashooda onlaynka ah. Ha ilaabin inaad ka hubiso qaaxda qaabilada kulliyada haddii aad hayso su'aalo.

WAXAAN GO'AAN KA HELAY KULLIYADA, MACNAHEEDU WAA MAXAY?

La aqblay – Waa lagu aqbalay. Hambalyo!

Liiska sugiga – Laguma diidin lagumana aqbalin. Kulliyadu waxay sugaysaa inay aragto int ay tahaya rdayda aqbali doona deeqdooda si loo go'aamiyo, haddii ay hadhay meel dheeraad ahi.

La diiday – Laguma aqblain. Ka feker sahaminta doorashooyinka kale ee kulliyada.

Go'aminta waxay tahay kulliyada la tegyaa way adkaan kartaa, laakiin helida dugsiga saxda ah ee aad leedahay, waxay kaa caawun kartaa guul iyo qalanjebin. Kala hadal la taliyahaaga dugsiga sare wax ku saabsan doorashooyinka.

* HA ILAABIN:

Marka aad gaadhay go'amadaadii kulliyada, waa inaad **ku wargelisaa kulliyada addoo xaqiijinaya diiwaangelintaada**. Wax badan 4-sano kulliyadaha muddada ay dhacaysaa waa Maayo 1.

WANAAGSAN IN LA OGAADO: Tani waa mid ka mid ah go'aanada ugu wayn ee aad samayn lahayd noloshada. **Inaad qaadato wakhti aadkaga fekerto** waxa ay kulliyad kastaa bixinayso. Ha ka baqan inaad rayi ka hesho xubnaha qoyskaaga, macalimiinta ama barayaasha.

SIDEEN ISKU BARBAR DHIGAA KULLIYADAHA?

Dhaqaalaha:

Ka feker inta uu leeyahay kharashka soo xaadirka ay daboolayaan **deeqaha** iyo **deeqaha waxbarasho**.

Ka feker sida adiga iyo qoyskaagu aad u dabooli doontaa gol daloolda qarashka waxabarashadaada kulliyada oo dhan.

Tacliinta:

Hubi haddii maadada xooga la saarayo **tacliinta** aad xiisaynaysaa laga geli karo kulliyada. Ka feker noocyada **taageerada tacliinta** la heli karo (tusaale, xarunta qoraalka, waxbarida xisaabta, adeegyada naafada, iwm).

Bulshadda:

Go'aan ka gaadh haddii kulliyadu ay tahay mid si wanaagsan ugu habboon bulshadda iyo dhaqanka (tusaale, kala duwanaanshaha, kooxaha ardayda, fursaddah waxbarida, iwm).

Ka feker nooca deegaanka aad jeceshahay (u dhow guriga, wayn, banaanka kulliyada, goob miyi ah, iwm).

MAARSO:
FASALKA 12



ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: U WAREEGIDA KULLIYADA

Waxaa laguu aqbalay kulliyada aad jeclaan lahayd inaad dhigato, laakiin tallaabooyin badan ayaa la qaadayaa ka hor inta aanad bilaabin fasalda.

TALLAABOYINKA 4-SANDO KULLIYADAHA:

1. Bixi kharashkaaga xaqiijinta ardayga cusub/diiwaangelinta.

Haddii aanad awoodin inaad bixiso **kharashka**, la xidhiidh **xafiiskaaga qaabilaada** oo waydii inay dib u dhigaan deebaajigaaga.

2. Ka codso **qoraalada buundooyinka rasmiga ah** dugsiagaagii sare iyo kulliyad kasta oo aad buundooyin ka heshay. U dir qoraalada buundooyinka kulliyadaada sida ugu dhakhsaha badan ee u dambaysa darajooyinka waa la soo geliyay.

TALLAABOYINKA 2-SANDO KULLIYADAHA:

1. **Gudbi** wixii ah foomamka iyo **kaalmada dhaqaale ee kale ee la codsaday** muddada loo qabtay.

2. **Dhamaystir** tallaabooyinka meelaynta xisaabta iyo **Ingiriisiga** ee kulliyadaada.

GURIYAYNTA

Guriyanta jaamacada waxaa ku jiri kara hoolalka la dego, qaybaha dabaqyada ama guryaha. Codsii inaad xarunta (xaramka) jaamaca ku noolaado oo hubso inaad bixiso deebaajiga guriyayntaada muddada loo qabto. La xidhiidh xafiiska guriyaynta wixii ah su'aalo kasta.

Guriyaynta jaamacada ka baxsan

doorashooyinka waxa ku jira ku noolaanshaha guriga, kiraysashada qayb dabaq ah/guri ama ku noolaanta guryaha walaalnimada iyo hablaha wada dega.

MAXAAN U BAAHANAHAY INAAN SAMEEYO KA HOR INTA AANAD BILAABIN KULLIYADA?

- Xaqiiji aqbaladaada** addoo soo gudbinaya caddayntaada diiwaangelinta iyo deebaajigada Maayo 1 ama muddada ay u qabatay kulliyadaadu.
- Aqbal abaalmarintaada kaalmada dhaqaale.**
- Qorshayso taladaada iyo tababarka ballamaha.**
- Codsashada guriyaynta** haddii aad dooranayso inaad ku noolaato **aaga jaamacada.**
- Soo gudbi diiwaanadaada tallaalka.** Ka hel diiwaanadan dhakhtarkaaga ama dugsiaga degmadda.
- Haddii aad u qalanto, **ku biir barnaamijyada taageerada ardayga** (waa loola jeedaa TRIO, EOP, CAMP) kaa caawin doona **la talinta tacliinta**, kharashka waxbarashada, kaalmada dhaqaale, iwm.
- Isku diiwaan geli fasalada.**

WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Haddii aad ku jirto kulliyada bulshadda ama farasamada oo 2 sano ah oo aad qorshaynayso kulliyad 4 sano ah mustaqbalka, la hadal la taliyahaaga wax ku saabsan koorsooyinka la qaadanayo. **Dhammaan duruusta 2-da sano uma wada wareegaan kulliyadaha 4-ta sano ah.**

MAXAY TAHAY JIHAYNTU?

Kuuliyadaha badankoodu waxay u baahanyihiin ardayda cusub inay soo xaadiraan tababarka jihaynta, halka ay ku bartaan wax ku saabsan **xarunta kulliyada** goobaha, isku diiwaangelinta fasalada iyo la kullanka filka. Qaar ka mid ah jihaynta kulliyadaha waa qof ahaan kuwa kalana waa onlayn. U kaalay qof ahaan tababarka jihaynta haddii aad karto! Waxaa lagugu marti qaadi karaa inaad soo xaadirta barnaamijka wareejinta xagaaga ee xooga saaraya u diyaar garayntaada saddexdaada bilow ee u horeeya.

ABRIIL: FASALKA 12



ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: WAXA AAD FILAYSO XILIGAAGA WAXBARASHO EE KOOWAAD

Beddelku waxa uu aad uga duwanyahay dugsiga sare qaabab badan. Waa muhiim in la ogaado waxa la filayo, markaas waxaad noqon kartaa mid guuleh.

MAXAY TAHAY INAAN WAXAAN SAMEEYAA MARKA KOOWAAD?

Hel cunto, guri, gaadiid, xarumo caafimaad, caafimaadka dhimirka iyo goobaha jidh dhisnaanta ee goobta waxbarashadda.

Baro halka aad ka heli karto taageero waxbarasho oo samee kooxo waxbarasho.

Baro ardayda fasalkaaga. Fasaladu way yaraan karaan (30 qof) ama ka wayn (500 qof) iyaddoo ku xidhan kulliyadaada. Waxaad kula kulmi doonyaa dad badan oo cusub dhexda fasalada, dhacdooyinka iyo naadiyada, waad ku xidhmi kartaa oo waxaad noqon kartaa qayb bulshadda ah.



Saadad kasta oo aad ku qaadato fasalka, waa inaad ku qaadataa ugu yaraan labba saacadood oo shaqada waxbarashada ah.

WANAAGSAN IN LA OGAADO:

Weligaa ha ka baqan inaad caawimo waydiisato – marka la shakiyo, la xidhiidh!

Kulliyadu waxay noqon kartaa wakhti ka mid ah wakhtiga ugu wanaagsan noloshada, laakiin waxay sidoo kale noqon kartaa mid aad u adag. Xusuus sababta aad doonayso inaad kulliyada u tagto. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad ku dhiiranaato inaad dhammayso **digriigaaga**.

TAG MID KASTA OO TILMAAMAHA MIISAANIYADA AH?

Buuggaagta iyo qoraalada waa qaali. **libso ama lacag ku amaanyso** si aad lacag u kaydiso; qababka korontada sidoo kale waa la heli karaa.

Jar kharashka maalinlaha ah ee aan lama huraanka ahayn (dibad ka soo cunida, bunka subaxda, baabuur dhigashada q aybta kulliyada, iwm).

Samee **miisaaniyada saddex bilood ah ama simisyar ah** ooku dhegenow!

SIDEEN WAKHTIGAYAGA UGA FAA'IIDAYSTAA?

* Fasalada qaarkood waxay kulmaan maalin kasta iyo qaarna hal mar todobaadkii. Waxay bilaabaan goor hore sida 8 subaxnimo iyo goor dambe sida 8 habeenimo. **Samee jadwalka fasalka adiga kugu habboon.** Gasaladu way ku kala duwanaan karaan dhismayaasha ku yaala goobta jaamacada. Sii naftaada wakhti kugu filan si aad u gaadho.

* Ka raadso caawmwimo saaxiibada, barayaasha ama goobaha xaramka ama **borofasoorada** muddada **saacadaha xafiiska**.

* Kulliyada waxaad haysaa **xoriyad badan** jadwalkaaga, oo qofka kuuma sheegayo halka aad u baahantahay inaad joogto ama marka. Waxaad isku mar ka hawshoon fasalada, hawalaha bulshadda, saaxiibada, dhaqaalaha iyo laga yaabaa xataa xaalad cusub oo noloshada ah ama shaqo. **Ku maamul wakhtigaaga adoo dheeli tiraya shaqadaa guri iyo xiisaha gaarka ah.**

MAAYO: FASALKA 12



ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: ILAHA KULLIYADA EE AAD U BAAHANTAHAY INAAD ISTICMAAHSO

Kulliyadaha waxay bixin karaan ila badan si ay kuu caawiyaan adigu inaad noqoto mid guulaysta. Dhammaan waxa ku jira **kharashkaaga waxbarashada** iyo **kharashyada**, markaas isticmaal iyaga!

XAGEEN U DOONTAA TAAGEERADA TACLIINTA?

La talinta kulliyadaha: Waxa uu caawiyaa fahanka nidaamyada tacliinta kulliyada, doorashada iyo codsiga **maadaha ahmiyada la saaro** iyo helida **ilaha** goobta jaamacada.

Maktabadaha: Waxa uu bixiyaa meelo waxbarasho oo kala duwan halkaas oo aad ka heli karto caawimada cilmi baadhida iyo la shaqaynta kuwa kale.

Xarumaha waxbarida gaarka ah: Waxay caawimo ka bixisaa maadooyinka sida qoraalka iyo xisaabta ee filkaaga.

Saacadaha shaqada: Wakhtiyada marka **barofosooradaadu** la hgeeli karo inay ka jawaabaan su'aalaha aad hayso ee ku saabsan fasalka.

KAALMADA DAHQAAALAH IYO TAAGEERADA DEEQDA WAXBARASHO?

Xafiiska kaalmada dhaqaale: Waxa uu kaa caawiyaa inaad fahanto **kaalmada dhaqaale** abaal marinta oo waxa uu bixiyaa macluumaadka ku saabsan ilaha maalgelinta dheeraadka ah oo waxa uu kaa caawiyaa inaad raadiso oo codsato **deeqaha waxbarashadda**.

HALKEEN KARAA ANIGU INAAN KA QAYB QAATO?

Ururka ardayda: Waxa uu bixiyaa meelo, dhacdooyinka, kooxaha waxbarasho iyo deegaan raaxo leh halka aad ku xidhmi karto kulliyada bulshadda.

Nolosha ardayga: Waxay bixisaa fursado badan oo goobta jaamacada ah.

Xafiiska waxbarashadda dibada: Waxay siisaa khibrado safar caalami ah oo macni buuxa leh buundada kulliyada.

Xarunta raaxaysiga iyo barnaamijyada: Kulliyado badan waxay leeyihiin jiimka, garoomada ciyaaraha, fasalada jidh dhiska ama naadiyada ciyaaraha.

XAGEEN KA HELI KARAA TAAGEERO LA GAARYEELAY?

Xarunta mihnada: Waxay ku siisaa la talinta mihnada iyo caawimada horumarinta khibrado shaqo, qoraalka faahfaahinta shaqo doonimadaada iyo u diyaar garowga waraysiga shaqada.

Xarunta Kala duwaanshaha/dhaqanada badan: Meesha ardayda midabka iyo bulshooyinka kale si loo helo taageerada bulshadda iyo dareenka oo waxay dareemaan badbaado si loo muujiyo fikradahooda iyo khibradaha.

Adeegyada la talinta: Waxay adiga ku siisaa la talinta qarsoodiga ah iyo taageerada caafimaadka masxkada.

Ilaaha naafada: Waxay siisaa habbaynta macquulka ee tacliinta ardayda u qalanta.

Macluumaadka teknoolajiga (IT): Waxay bixisaa adeegyada teknoolajiga ka duwan oo waa meesha ugu horaysa ee codsiyada la xidhiidha teknoolajiga goobta jaamacada.

Adeegyada ruug cadaaga: Waxay u shaqaysaa sidii isku xidhaha Waaxda Arrimaha Ruug cadaaga oo waxay caawisaa wareegida dadkii ciidaha hore ahaan jiray ee ka wareegaya ciidanka ilaa nolosha tacliinta.

MAAYO: FASALKA 12



AQOONTA KULLIYADA

QAAMUUSKA ERAYDA

BOGGA 1

Abaalmarinta: Deeqda kulliyada ama minhada dugsiga sheegta nooca (amaahda, kaalmada machadka, deeqaha, deeqda waxbarasho iyo daraasada shaqo) iyo qadarka kaalmada dhaqaale dugsigu uu diyaar u yahay inuu bixiyo haddii uu aqbalo qaabilaada oo diiwaangeliyo in la qaato fasalo xaga dugsiga.

Adag: Dugsiga si suuragal ah lagaa aqbali doona, sababtoo ah waxaad tahay codsade tartan badan.

Adeega waxbarashada: Fursada lagaga qayb galayo hawlaha adeega bulshadda oo ka dib loo codsanayo khibrada tacliintaada iyo koboca gaarka ah.

Ahmiyada muddada ay dhacayso: Taariikhda aad u baahantahay inaad ku soo xarayso FAFSA ama WASFA si loo helo ahmiyada tixgelinta. Muddada ay dhacaysaa waxa uu go'aamiyaa nooca maalgelinta aad u qalmi doonto iyo marka lagu abaal marin doono.

Amaahda Federaalka: Amaahdu waa lacag aad amaahato oo aad dib u bixinayso iyaddoo wadata dulsaar. Amaahda ay samayso dowlada federaalku, loogu yeesho amaahda ardayda federaalka, caadi ahaan waxay siisaa amaahdayaasha qiime dulsaar hoose oo waxay leedahay doorashooyinka dib u bixinta ka debesan amaahda baanka ama ilaha gaarka ah ee kale. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijka amaahda federaalka: studentaid.ed.gov/sa/types/loans.

Ardayga aan weli shahaadad qaadan: Ardayga kulliyada ee ku dadaalaya siday shahaado u qaadan lahaayeen ama shahaadada digriiga (bekelooriyada).

Baahida Dhaqaale: Qadarka lagu xisaabiyo qaadashada kharashka soo xaadirka ee kulliyada laga jaray tabarucaadka laga filayo qoyskaaga sida lagu xisaabiyaya FAFSA ama WASFA.

Badbaadada: Dugsiga hubaal ahaan waa lagu aqbali doonaa, laakiin waa taageerada kiiska kuwa kale ee aan shaqaynayn.

Barofoseerka: Qaabka guud ee loola hadlo macalinka kulliyada.

Bilowga Orodka: Barnaamijka ku siiyaa doorashada soo xaadirka machadyada sare ee waxbarashada sare marka isl marka aad shaqaysanayo buundada dugsiga sare/ jaamacada. Ardayda ku jirta fasalka 11 iyo 12 waxaa loo oggolyahay inay qaataan koorsooyinka Central Washington University, Eastern Washington University, Northwest Indian College iyo Washington State University. Bilowga Orodka (Running Start) waa hal qaab oo lagu shaqaysto buundada kulliyada marka dugsiga sare lagu jiro. Si aad wax badan uga ogaato barnaamijkan iyo doorashooyinka kale ee laga heli karo dugsigaaga, fadlan booqo readysetgrad.org/dual-credit.

Bixinta Khibrada Shaqo: Furdada lagu raaco xirfad yaqaanka si loo arko waxay shaqadu u eegtahay.

Bixinta lacagta: Bixinta kaalmada dhaqaale ee ardayga.

Buundada: Caadi ahaan sahaqayso hal buundo wixii ah dhammaystirka guusha leh koorsada keliya ee dugsiga sare. Washington waxay u baahantahay inay dhammaystirto tirada ugu ee buundooyinka lagu qalanjebiyo. Buundada kulliyada waxaa lagu qiyaasaa si ka duwan dugsiga sare.

Cabbirka fasalka: Tani waa tirada celceliska ee ardayda fasalka.

Cabbirka Goobta waxbarasho: Tani waa tirada ardayda ka diiwaangashan kulliyada.

Cambridge International: Barnaamij laba dhibcood leh oo ardayda siiya fursadda ay ku kasban lahaayeen buundooyinka dugsiga sare iyo kulliyadda isla mar qudha.

Carwooyinka Kulliyada: Dhacdada halka kulliyada iyo wakiilada jaamacadu ay ku bixiyaan macluumaadka ku saabsan dugsigooda oo kaga jawaabaan su'aalaha. Tani waa fursad wayn in wax laga ogaado ku saabsan doorashooyinka kala duwan ee kulliyada.

Celceliska Buundada Fasalka (GPA): Qaabka loogu wareejiyo warqadda buundooyinka qiyaasaha tirooyinka ah. Buundooyinka laga helay fasalada waxaa laysugu celceliyaa si wada jir ah si ay u gaadhaan buundo is biirsatay. Waxaad ka heli kartaa GPA qoraalada buundooyinkaaga dugsiga sare.

Cilmi baadhida Kulliyadaha Dad waynaha 4-sano: Dugsiyadan waxay ka sahaqeyeen hawlaha cilmi baadhida ballaadhan oo waxay bixiyaan digriiyada bekelooriyada, mastarta iyo digtooraaga.

AQOONTA KULLIYADA QAAMUUSKA ERAYDA

BOGGA 2

Codsiga: Foomka aad buuxinayso si aad u codsato kulliyada, deeqda waxbarasho, ama kaalmada dhaqaale.

CTE Dual Credit: Fasalada ardayda ka caawiya inay ka gudbaan dugsiga sare una gudbaan barnaamijyada farsamada iyo mihnadaha.

Dakhliga: Wadarta qadarka ee lacagta aad shaqaysato sanadkiiba.

Deeqaha: Qaabka kaalmada hadiyada, caadi ahaan ku salaysan baahida dhaqaale. Deeqda waxbarasho dib looma bixinyo lacagteed, tusaale ahaan, waxaad ka noqotay dugsi oo waxaa lagugu yeeshaa lacag celin.

Deeqda wa: Lacagta lagugu abaal mariyo ee ku salaysan heerka sida tacliinta, ciyaaraha fudud, adeega bulshadda ama baahida dhaqaale si loogu caawiyo bixinta kharashka waxbarashadda. Deeqda waxbarasho din lacagteeda looma bixinayo.

Dembi xun oo lagu xukumay: (dembiyada aadka u halista ah) diiwaanada dembiyo lagu xukumay waa la hubiyaa, sida dhammaan shuruudaha ballanka, ka hor abaal marintaada Deeqda Waxbarashada ee Bound College.

Diboolada: Shahaadada la siiyo dugsiga sare si loo tuso ardayga inuu si guuleh u dhammaystay dugsiga sare.

Digriiga Koowaad ee Labada Sano: Digriiga noocan ah waxa uu sheegaa dhammaystirka barnaamijka kulliyada labbada sano. Arday badan waxay heli karaan Digriiga Koowaad ee Labada Sano kadibna waxay u wareegi kara kulliyada 4-sano.

Digriiga bekelooriyada: Noocan digriiga ah waxa u sheegaa dhammaystirka barnaamijka afarta sano.

Digriiga: Shahaadadu waxay sheegaysaa dhammaystirka barnaamijka labba ama afar sano xaga kulliyada ama jaamacada. labbada ugu badan ee digriiyada waa shaahada Digriiga Koowaad ee Labada Sano iyo digriiga bekelooriyada.

Diiwaangelinta Wakhtiga buuxa: Si lagaaga fekeri arday wakhti buuxa, waa inaad isku diiwaangelisaa 12 rubuc ama buundooyinka simisterka xili kasta.

Dugsiga sare iyo Qorshaha ka Dambeeya: Agabka lagu caawinayo inuu ku dhex hago dugsiga sare. Qorshayaasha la gaaryeelay oo loogu talo galay inay caawiso ardaya inay ka fekerto wax ku saabsan mustaqbalkooda oo ay doortaan shaqada kooraska u diyaar gareeya iyaga hadafyada ka dib dugsiga sare. Tani waa shuruuda qalinjabinta sidoo kale.

Faa'idooyinka: Ma jiro mushahar lacag bixin la siiyo shaqaalaha sida caymiska caafimaadka ee caafimaadka, ilkaha iyo araga.

FAFSA: Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayga Federaalka, heerka caadiga ah ee foomka ardayda waa in la dhammaystiraa si looga codsado federaalka iyo caawimada/ iyo barnaamijyadabaahida ku salaysan gobolka iyo, duruufaha kale, caawimada/gargaarka ku salaysan goobta jaamacada. Ka barowax badan oo ku saabsan fafsa.gov.

Falka Sharci ahaa la daahiyi Imaanshaa Ilmaha (DACA): Barnaamijka uu ku dhawaaqay Juun 12, 2012 Madaxwayne Barack Obama si uu u ilaaliyo shakhsiyaadka u qalmo ee mastaafurinta iyo helida oggolaanshaha shaqada ilaa 2 sano. Shakhsigu waa inuu yimid ka hor da'da 16, uu leeyahay diiwaan saafi ah, iwm. Falka daahinta mastaafurinta ma bixiyo kaadhka akhtarka ah ama dhabada muwaadinimada.

Faraqa Lacagta: Faraqa u dhexeeya kharashka sanadka buux deeqaha iyo deeqaha waxbarasho ee lagu siiyay. Sidoo kale waxaa loo tixraaci karaa sidii kharashka jeebka ka baxsan taas oo ah lacagta ardayga iyo qoyskeedu ay ka masuul ahaan doontaa bixinteeda.

Faraqa u dhexeeya Mushaharka: Faraqa u dhexeeya inta ay leegtahay kuwa kulliyada wax ka barta iyo xirfad yaqaanada ka waxbarashada hooseeya ee dhalinyarta ah ay shaaystaan.

Gaadh: Dugsiga aan lagu aqbali karin, laakiin weli ku xaq mudan codsashada sababtoo ah waa dugsigii riyadaada.

Ganaxsiga: Nooca dugsiga sidoo kale waxaa loo tixraaca sidii tababar xirfadeed, bixinaya tababar la gaar yeelay, xirfado ama waxbarasho qaybo gaar aah, sida samaynta qasabadaha biyaha, nijaarada, iwm.

Goobta Jaamacadda: Dhismaha qayb ka ah kulliyada, sida dhismaha iyo dhulka.

Hawlaha ka baxasan manhajka: Hawl kasta oo aad ku qabto dibada fasalka, sida ciyaaraha fudud, naadiyada, adeegyada bulshadda, iwm.

Heerka Socdaalka: Booska sharciga ah ee dadka ku nool wadanka si joogta ah la'aanta muwaadinimada.

Iimaylka Is waafaqsan: Wada xidhiidhka Deeqda Waxbarasho ee Bound College (CBS) barnaamijka marka FAFSA ama WASFA gaaga oo ay waafaqso codsigaaga CBS. Tani sidoo kale waa marka kulliyadaadu ogaato inaad tahay arday Bound College.

AQOONTA KULLIYADA

QAAMUUSKA ERAYDA

BOGGA 3

Imtixaanka meel gaynta: Kulliyadaha qaarkood waxay u baahan doonaan inaad gasho imtixaanka meelaynta si loo go'aamiyo qaybta fasalada ah ee aad qaadan karto. Iyaddoo ku salaysan imtixaanka, waxaad u baahan kartaa inaad qaadato heerka gelida fasalka ka hor inta aanad qaadan fasal kale oo barnaamijkaagu u baahanyahay.

Jawaabaha Jawaabta Gaaban: Su'aalo dheeraad ah oo aad u baahan karto inaad qorto kuwaas oo xooga saaraya fikro gaar ah, sida kala duwanaanshaha, dhaqanka iyo tusaalooyinka sii wadista/ka gudbida kala duwanaanshaha.

Ka dhaafidda Kharashka: Haddii aad bixinayso lacagta codsi ama kharashka imtixaanka uu sababi karo dhibaato dhaqaale, waxaad heli kartaa ka dhaafida kharashka si looga saaro meesha lacag bixinta.

Kaalmada Dhaqaalaha Gobolka: Caawimada dhaqaalaha.barnaamijyada kaalmada la maalgeliyo oo ay maamusho gobolka ay noga caawimaad kharashka sare ee kulliyada.

Kaalmada Dhaqaale: Deeq kasta ama deeq waxbarasho, amaah, ama barashada shaqada (shaqo lacag la bixiyo) la siiyay si ay kaaga caawiso adiga inay buuxiso kharashka kulliyada.

Kharashka Soo xaadirka (COA): Wadarta qadarka waxa uu qiimaheedu noqon doonaa in la tago kulliyada sanad kasta. Tan waxaa ku jiri kara kharashka waxbarashada iyo karashyada, qolka goobta jaamacada iyo cunto (ama guriyanta iyo gunnada cuntada ardayda ka baxsan goobta jaamacada); buuggaagta, saadka iyo gaadiid raaca.

Kharashka waxbarashadda: Qiimaha kulliyada ama jaamacada soo dalacdo buundooyinka/xiisada, tan waxa lagu bixiyaa lacagta baraha iyo meesha fasalka. Kulliyad kastaa waxay leedahay kharash waxbarasho oo gaar ah.

Kharashka: Lacagta aad ku bixiso helida hawlaha dugsiga, xarumaha jimicsiga dhiska, maktabadaha iyo xarumaha ardayda. Kulliyad kastaa waxay leedahay kharash gaar ah.

Kharashyada Kulliyada: Lacagta loo isticmaalo in lagu bixiyo ku noolaanshaha goobta jaamacada, cuntadda, buuggaagta iyo wixii kale aad u bahan tahay, kharashka gaarka ah iyo gaadiidka.

Ku jira Tababarka Shaqada (OTJ): Tababarka shaqada la dhammaystiray goobta shaqada rasmiga ah.

Kulliyada Dad waynaha Dhammayska tiran 4-Sano:

Dugsiyadan way yaryihiin, oo gobol ahaan ayay ku salaysanyihiin oo waxay bixiyaan digriiyada bekelooriya iyo mastarta.

Kulliyada: Farsamo, tababar shaqo, 2-sano ama 4-sano mid gaar ah ama kulliyada ama jaamacada dad waynaha.

Kulliyadaha Bulshadda iyo Farsamda (CTC): CTCs waa magaca badanka loo isticmaalo in la sharasho kulliyadaha dad waynaha 2-sano ee Washington. Dugsiyada waxay bixiyaan digiriiga koowaad ee labada sano, shahaadooyinka siiba udiyaariyaan ardayda ganacsiyada gaarka ah. Arday badan waxay heli karaan Digiriiga Koowaad ee Labada Sano kadibna waxay u wareegi kara kulliyada 4-sano. Gobolka Washington waxa uu leeyahay 34 CTCs dad waynaha ah.

Kulliyadaha Dad waynaha 2-sano: Dugsiyada waxay bixiyaan digiriiga koowaad ee labada sano, shahaadooyinka siiba udiyaariyaan ardayda ganacsiyada gaarka ah. Arday badan waxay heli karaan Digiriiga Koowaad ee Labada Sano kadibna waxay u wareegi kara kulliyada 4-sano.

Kulliyadaha Gaarka ah 2-sano: Dugsiyada waxay xooga saaraan ganacsiyo gaar ah ama xirfado oo guud ahaan lama maalgeliyo.

Kulliyadaha Gaarka ah 4-sano: Dugsiyadan waxay bixiyaan bekelooriyada oo sidoo kale digriiga mastarta laakiin way madax banaanyihiin oo si guud looma maalgeliyo. Kulliyadahan iyo jaamacadahan waxay leeyihiin fasalo ka yar xaga cabbirka.

La cusboonaysiin karo: Deeqda waxbarasho ee aanu ka heli karto wax ka abdan hal sano ilaa dhammaan shuruudaha u qalmida la buuxiyo.

La qaadi karo: Deeqaha waxbarashada qaarkood waxay ku xidhinyihiin kulliyado gaar ah. Deeqa waxbarashadda la qaadi karo waxaa lagu isticmaali karaa kulliyada dookhaaga ah oo waxay kuu raacdaa dugsiga aad dhigato.

La talinta Tacliimeed: Waxa uu caawiyaa fahanka nidaamyada tacliinta kulliyada, doorashada iyo codsiga maadaha ahmiyada la saaro iyo helida ilaha goobta jaamacada.

La taliyaayaasha Qaabilaada: Wakiilada kulliyada (wakhtiyada qaarkood la taliyaayaasha qaabilaada) kuwaas oo bixin kara macluumaad ku saabsan kulliyada oo dib u eegi kara codsiyada ardayda.

AQOONTA KULLIYADA

QAAMUUSKA ERAYDA

BOGGA 4

Maadada xooga la saarayo: Maado gaar ah oo aad doorto inaad barato. Fasalo aad u fara badan oo aad qaadato waxay la xidhiidhi karaan maadada aad xooga saaraysa.

Madasha Kulliyada ee Onlaynka ah: Kulliyadaha qaarkood waxay leeyihiin websaydkooda, kaas oo ku isticmaali karto si aad u hubiso go'aamada qaabilaada, kaalmada dhaqaalaha, darajooyinka, iwm.

Meelaynta (AP): Barnaamijka u oggolaada ardayda inay qaataan koorsooyinka heerka kulliyada marka ay weli ku jiraan dugsi sare. Ardayda waxay heli karaan buundo kulliyadeed iyo/ama meelayn sare ilaa koorsooyinka kulliyada sare iyagoo qaadanaya imtixaanka AP. Kulliyado badan iyo jaamacado waxay aqoonsan yihiin koorsooyinka AP marka la samaynayo go'aanada qaabilaada.

Miisaaniyada Kulliyada: Qadarka lacagta aad awoodo inaad ku bixiso kharashka kulliyada.

Mushaharka: Wadarta qadarka ee lacagta aad shaqaysato shaqadaada. Shaqooyinka qaarkood waxay bixiyaan mushahar oo kuw akale waxay ku bixiyaan mushahar saacadle ah.

Qiimaynta Gobolka: Xisaabta, Ingiriisiga, iyo imtixaanada sayniska waxay qaateen qiimaynta dugsi sare.

Qolka iyo Cuntadda: Kharashka la xidhiidha noloshu goobta jaamacada ama ka baxsan ee ay ku jirto qorshayaasha cuntooyinka.

Qoraalada buundooyinka rasmiga ah: Kulliyadaha badankooda waxay u baahanyihiin qoraala darajooyinka dugsi sare, kaas oo ah diiwaanka tacliinta ardayga oo ay ku jiraan saxeexa Diiwaangeliyaha iyo arrimaha taariikhda. Qoraalka buundooyinka rasmiga ah waxa lagu gudbiyaa warqad xidhan. Haddii aad shaqaysatay buundada kulliyada, waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad gudbiso qoraalka buundooyinkaaga kulliyada.

Saacadaha Shaqada: Wakhtiyada markabarofosooradaadu la heli karo inay ka jawaabaan su'aalaha aad hayso ee ku saabsan fasalka.

SAT ama ACT: Imtixaanka gelida ay isticmaalaan kulliyaduhu sidii qayb go'aanka oggolaanshaha ah. Waxaad u baahan doontaa inaad gudbiso buundooyinka onlaynka ah ee imtixaanka dhexda websaydka wakaalada imtixaanka qaadaysa.

Shahaadada Caalamiga ah ee Bekelooriyaytka (IB):

Barnaamijka siiya mid loolan leh, koorsooyin adag ah oo waxbarasho. Ardaydu qaata imtixaanada IB waxay leeyihiin fursada ay ku helaan buundada kulliyada ama meelaynta hore, ama labbadaba, gudaha koorsooyinka kulliyada ee sare. Kulliyado badan iyo jaamacado waxay aqoonsan yihiin koorsooyinka IB marka ay samaynayaan go'aanada qaabilaada.

Shahaadada: Shahaadadu waa abaal marinta in la sheego aqoonta maadooyinka gaarka ah ama xirfada.

Shahaado sharad: Caddaynta rasmiga ah in dugsi sare ama koorasku uu buuxiyay heerarka ay dejiyeen maamulashaaha dibadu.

Shuruudaha shaqada: Shaqooyinka qaarkood waxay u baahanyihiin waxbarasho gaar ah, tababar, ama xirfado si ay ugu takhasusaan booska.

Taageerada Tacliinta: Adeegyada goobta jaamacada ee taageera guusha tacliinta, sida waxbarida, la talinta, iwm.

Tababar shaqo: Sidoo kale waxaa loo tixraaca dugsi ganacsiga, kulliyadahan waay bixiyaan tababar la gaar yeelay, xirfado ama waxbarasho qaybo gaar ah, sida samaynta qasabadaha biyaha, nijaarada, iwm.

Tababarka jihatiga: Kuuliyadaha badankoodu waxay u baahanyihiin ardayda cusub inay soo xaadiraan tababarka jihatiga, halka ay ku bartaan wax ku saabsan xarunta kulliyada goobaha, isku diiwaangelinta fasalada iyo la kullanka filka. Qaar ka mid ah jihatiga kulliyadaha waa qof ahaan kuwa kalana waa onlayn. U kaalay qof ahaan tababarka jihatiga haddii aad karto! Waxaa ardayda marti qaadi karaa inay soo xaadiraan barnaamijka wareejinta xagaaga ee xooga saaraya u diyaar garayntaada saddexdaada bilow ee u horeeya.

Tababarka shaqada: Fursada loogu shaqeeyo ururka ama shirkad si loo kobciyo khibrada shaqada. Qaar ka mid ah tababarka shaqadu lacag lama bixiyo, laakiin qaar ayaa la cag la bixiyaa.

Tababarka Xirfadaha Shaqo: Barnaamijka kuu oggolaada inaad barato xirfad gaar ah marka aad ka shaqanaysa qayb la xidhiidha oo shaqaysato lacag.

U qalmida: Tani way ku kala duwanaan doontaa deeq waxbarasho ahaan. Deeqaha waxbarasho qaarkood waxay xooga saaraan heerka qiimaynta gaarka ah, sida kala duwanaanshaha, hal abuurka iyo sifooyinka kale/xirfadaha.

AQOONTA KULLIYADA

QAAMUUSKA ERAYDA

BOGGA 5

Ururada Ganacsiga: Ururka shaqaalaha u dooda xuquuqdooda, laakiin sidoo kale bixiya fursadaha tababarka shaqada.

Warbixinta Gaarka ah: Qaabka kulliyada si loo ogaado adiga iyo sababta aad u xiisaynaso dugsiga.

Wareejinta: Wareejintu waxay dhacdaa marka lagu beddelo dugsi kale. Caadi ahaan, kulliyada bulashaddu waxay bixiyaan 2-sano oo digrii ah oo leh dhabada lagu wareejinayo ilaa 4-sano dugsi ah.

Warqaddaha Amaanta qofka ah: Warqaddahu waxay ka hadlaan tayooyinkaaga, sifooyinka iyo kartiyaha. Warqaddahan caadi ahaan waxay ka yimaadaan macalimiinta, la taliyayaasha, bulshadda ama hogaamiyayaasha diinta, loo shaqeeyayaasha iyo dadka kale ee ka baxsan qoyskaaga.

WASFA: Codsiga Washington ee Kaalmada Dhaqaalaha Gobolka, codsiga waxaa loo heli karaa kuwa aan muwaadinka ahayn ee u qalma ee Deeqda Baahida Gobolka iyo Deeqda Waxbrashada ee Bound College. Waxbadan ka baro readysetgrad.org/WASFA.

Xafiiska Kaalmada Dhaqaale: Waxa uu kaa caawiyaa inaad fahanto kaalmada dhaqaale abaal marinta oo waxa uu bixiyaa macluumaadka ku saabsan ilaha maalgelinta dheeraadka ah oo waxa uu kaa caawiyaa inaad raadiso oo codsato deeqaha waxbarashadda.

Xulashadda: Qiyaasta siday adiga kuugu adagtahay in lagu oggolaado kulliyada. Tan waxaa lagu qiyaasaa boqolkiiba ardayda loo aqbalo si sanadle ah. Heerka aqbalaada hoose, inta badan ee xulashada dugsigu badato ay tahay.

AQOONTA KULLIYADA ILAHA

Boston Consulting Group, & Washington Roundtable. (2016). *Dhabooyinka Shaqooyinka Wacan ee WA*. Seattle. Laga soo qaatay http://www.waroundtable.com/wp-content/uploads/2017/03/WKWJ_FINAL_Report.pdf

Bureau of Labor Statistics. (2017). *Xoogsiga Caadiga ah ee todobaadlaha ah ee Shaqaalaha ku shaqeeya Mushaharka iyo Yoomka* (USDL-17-10). Washington, D.C. Laga soo qaatay <https://www.bls.gov/news.release/pdf/wkyeng.pdf>

Carnevale, A. P., Jayasundera, T., & Gulish, A. (2016). *America's Divided Recovery: Kuwa kulliyada Haysta iyo Kuwa aan Haysan*. Xarunta Jaamacada Georgetown ee Waxbarashada iyo Xoogsata. Washington, D.C. Laga soo qaatay <https://cew-7632.kxcdn.com/wp-content/uploads/Americas-Divided-Recovery-web.pdf>

Carnevale, A. P., Smith, N., & Strohl, J. (2013). *Soo kabashada: Koboca Shaqada iyo Shuruudaha Waxbarashada Ilaa 2020*. Xarunta Waxbarashada iyo Xoogsata. Washington, D.C. Laga soo qaatay https://cew-7632.kxcdn.com/wp-content/uploads/2014/11/Recovery2020.FR_Web_.pdf

Carnevale, A. P., Smith, N., & Strohl, J. (2015). *Koboca Shaqada iyo Shuruudaha Waxbarashada Ilaa 2020, Warbixinta Gobolka*. Xarunta Waxbarashada iyo Xoogsata. Washington, D.C. Laga soo qaatay https://cew-7632.kxcdn.com/wp-content/uploads/StateProjections_6.1.15_agc_v2.pdf

Kena, G., Hussar, W., McFarland, J., de Brey, C., Musu-Gillette, L., Wang, X., ... Dunlop Velez, E. (2016). *Xaalada Waxbarashadda 2016* (NCES 2016-144). Washington, D.C. Laga soo qaatay <http://nces.ed.gov/pubsearch>

Khan Academy. (2014). *Kharashka dhaqaale iyo dheefaha kulliyada*. Laga soo qaatay Ogosto 17, 2017, <https://www.khanacademy.org/college-careers-more/college-admissions/get-started/importance-of-college/a/financial-costs-and-benefits-of-college>

Taylor, P., Fry, R., & Oates, R. (2014). *Kharashka Kordhaya ee Tegid la'aanta Kulliyada*. Washington, D.C. Laga soo qaatay <http://www.pewsocialtrends.org/2014/02/11/the-rising-cost-of-not-going-to-college/>

Guddida Isku duba ridka Waxbarashadda Sare ee Gobolka Texas. (2016). *Qoysheynta Kulliyada iyo Hagaha Kaalmada Dhaqaale*. Austin. Laga soo qaatay <http://gentx.org/wp-content/uploads/2016/10/College-Planning-Guide-English-2016.pdf>

Jaamacadda Washington Mashruuca Riyada. (2015). *Buugga Shaqada Mashruuca Riyada* (Tobnaad). Seattle: Mashruuca Riyada. Laga soo qaatay <http://www.washington.edu/dreamproject/files/2015/03/Workbook-2015.pdf>

Waaxda Gobolka Washington ee Shaqada iyo Warshadaha. (2012). *Hagaha Waalidka ee Tababarka shaqada*. Laga soo qaatay <http://lni.wa.gov/IPUB/100-530-000.pdf>



AQOONTA KULLIYADA

**DEDAAL WADA SHAQAYN LEH EE U DHEXEeya URURADA SI AY U BIXIYAAN
MACLUUMAADKA U DIYAAR GARAWGA DHAMMAYSKA TIRAN EE KULLIYADA**

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo si aad u aragto **qaamuuska**, eeg websaydka:

WCAN.ORG | PSCCN.ORG | READYSETGRAD.ORG | ROADMAPPROJECT.ORG

